



MAANSADA MASIIXA

**Anthology of Somali
Christian Poetry**

Aweis A. Ali
Series Editor

ISBN 978-9914-708-03-5





MAANSADA MASIIXA

Anthology of Somali Christian Poetry

Volume 3

First Edition, 2021

Aweis A. Ali
Series Editor


KENPRO
Publications
Nairobi, Kenya


Kenya Projects Organization [KENPRO] is membership organization founded and registered in Kenya in the year 2009 under the Ministry of Gender, Culture and Social Development. The mandate of the organization is to build human and institutional capacities in the fields of Development Projects, Research and Publishing.

Kenya Projects Organization (KENPRO)
Off Magadi Road, Ongata Rongai
P.O. Box 15509 - 00503, Mbagathi - Nairobi
Tel. +254 202319748 | Mobile: +254 725 788 400
Email: infokenpro@gmail.com | Website: www.kenpro.org

EDITING, LAYOUT, FORMAT AND DESIGN
Anthony M. Wanjohi, Erastus K. Irungu and James Gavo

ISBN 978-9914-708-03-5
First Published 2021

© Aweis A. Ali
amazingwisdom@gmail.com



This book has been published under the auspices of the Somali Bible Society

Email: info@SomaliBibleSociety.org | Website: www.SomaliBibleSociety.org




This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 Licence. You are free to copy, communicate and adapt the work, as long as you attribute the author.

TABLE OF CONTENTS

DEDICATION.....	viii
HORDHAC	xvi
QIRASHADA IIMAANKA	xvii
U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA	xvii
BARYADA RABBIGA.....	xviii
SABUURKII NEBI DAA’UUD.....	xviii
TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE.....	xviii
KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA	xx
ERAYGAAGU WAA NOLOL.....	1
UMMAD BAYNU NAHAY	1
ERAY BAAN SIDNAA	2
EEBBAAN WADA JECELNAHOO.....	3
EEBBAHEEN KU DHAWR	4
AMBADNIMO KAA ILAALSHAY.....	5
IIMAANKA WEEYAAN.....	5
KUWAA INKIRAAAYA YEELKOD.....	6
XAQA KUWA KA IISHOW.....	7
ADDUUN LAGU WAARI MAAYO.....	8
WAXAANSE AYAAN U HELAY.....	8
AXDI CUSUB HADDUU YIMID	9
MUGDIGII IDLAAYOO.....	10
QOOM LOO BOGAY AHAADA.....	1
IIMAAN BUUXA II YEEL.....	1
BADBAADSHOW MASIIXOW	2
BOQOROOW NA SII.....	3
MAALINTII BA’NAYD	4
BAADINIMADU WAA HALIS	5
RUMAYSADKA LAGU BADBAADO.....	5
BARQADAAN AQBALAY	6
BAQDINI IGA REEBI MAYSO.....	7
RAJADU WAY BISLAATAYE	7
HADDABA IIMAAN BEDQABA.....	8
TOGDHEER.....	10

JABHADDII MASIIX.....	12
XER LA DOORTAY.....	14
DAD YAHOW DHEGAYSTA.....	16
DAD LA DOORTAYOO.....	16
KUWA DARTAA INNOO NECEB.....	17
IN AAD TAHAY DAA'IMKII.....	18
HADDABA WAA IGA DARDAARAN.....	19
INAAD BAQDIN DARAADDEED.....	19
SAMO DOON WAXAAN AHAY.....	20
RABIYOOW MASIIX.....	23
RASUUL SIDA WANAAG.....	23
SAYIDKAAN U SHEEGNAA.....	26
SAMAALOOW SAYID MASIIX.....	26
SOORTA XIKMADDA QUUTA.....	27
SHAAFICI.....	30
NOO DHALATAY GUUL.....	32
WAXAY DHAAYUHUBA ARAG.....	33
EEBBAASE DHAMMAAN U NAXAY.....	33
U FUR DHAAYIHIYO QALBIGA.....	34
DHANKA MIDIG KUWAAD MARIN.....	35
ILLAA DHIMASHADA XAJIYA.....	35
CIISAW MASIIX.....	38
CIIDANKII MASIIX.....	38
HADDAAD CABSII WAYN DAREENTO.....	39
MARNABA HA KA BAQAN CADAAWAHA.....	40
DAD BAA MOODA CIISE.....	41
WUUNA CAMAL QABAW YAHAY.....	41
XER AAN CABSAN BAYNU NAHAY.....	42
CISHADII AAN AQBALAY ISAGA.....	43
INTAY GOORI GOOR TAHAY.....	45
DABA GALA BADBAADSHAHA.....	46
II GALAY ABAAL WAYN.....	46
GAR BAY IGU TAHAY ANIGA.....	47
GAASHAAN DIFAAC U AH.....	48
GUUSHIYO BADBAADADA.....	48
GACMAHA INTAAN SARE U QAADO.....	49



IBLAYS GUDAYAASE JIRA	50
ILA GOCO GROVES	50
INJIILKAAN FAAFINNA.....	55
DHAMMAAN QOYS BAAD TIHIIN	57
QORSHAHA RABBIGEENU DHIGAY	57
XAQU QAALI WEEYEE.....	58
KHAYRKA DHALASHADIISAA.....	59
MASIIX IDIN KAAFIN KARA.....	61
SOOMAALIDA LOO SHIREE.....	63
SILICAY KU MARIYEEN	65
MASIIXA NA DOORTAYOOW	66
HADDAY JAWAABTU MAYA TAHAY	67
GEBAGEBAA LA MARAYAA.....	68
MASIIXINIMAAN KU DHIMAN.....	68
KALA MUDAN DHARAARUHU.....	69
ANIGU KAAMA MAARMI KARO	70
DHALASHADI MASIIXEE	71
MARKUU DHICI QIYAAMUHU.....	72
MUUQDAY ISAGA OO NOOL	72
MASIIXII I DOORTAYOW	73
MODRICKERS MA MAQSHEEN?.....	74
NASRI EEBBE WEEYAAN	78
WAYNOW MASIIX	80
WADAADDO XUN BAASE KACAY	81
YAY HIIL KA SUGAYAAN?.....	83
KAALAY GUUSHA HOO	83
WAXAANSE HUBAA SAMADA	84
HUNUUHUNUU MA JOOGTEE	85
WAXAAN DEGAY HIR DOOG LEH	86
HALKAYSE KA JIRTO MIDNIMO	86
NIMCADAAN KU HOOS JIRI	87
HAKAD YAANU NAGA GELIN.....	88
SOOMAALIDA YAABTAYEE.....	90
GUNAANAD.....	91
ABOUT THE EDITOR	93

WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS BOOK 1/2

The third volume of *Maansada Masiixa* contains rich hymns and powerful Christian songs which will eternally remain an asset to the Somali Church. Special thanks to the various composers of the poetry in this splendid book.

Rev. Mukhtar H. Faarah
A Businessman and House-church Pastor
Benadir Region, Somalia

What a joy to read this new volume of the celebrated *Maansada Masiixa* series. May our heavenly Father use the treasures in this book to draw the people of God closer to Himself.

Pastor Mohamud M. Nur
A Farmer and House-church Pastor
Lower Shabelle Region, Somalia

The *Maansada Masiixa* series is improving with time! Every Somali Christian should have their copy as soon as possible.

Abukar M. Haji
Cattle Herder and Worship Leader
Lower Shabelle Region, Somalia





DEDICATION


This book is dedicated to the late Sayid Ali Omar Mohamed “Tees” (01 January 1968 - 07 July 2020). Tees was an evangelist and a house-church pastor. He died unexpectedly under suspicious circumstances in Mogadishu, Somalia.


TUSMADA BUUGGA

1. Eraygaagu waa nolol
Amin A. Axmed
2. Ummad baynu nahay
Y. B. Xirsi
3. Eray baan sidnaa
Y. B. Xirsi
4. Eebbaan wada jecelnahoo
Y. B. Xirsi
5. Eebbaheen ku dhawr
Y. B. Xirsi
6. Ambadnimo kaa ilaalshay
Amin A. Axmed
7. Iimaanka weeyaan
Amin A. Axmed
8. Kuwaa inkiraaya yeelkood
Amin A. Axmed
9. Xaqā kuwa ka iishow
Amin A. Axmed
10. Adduun lagu waari maayo
Amin A. Axmed
11. Waxaanse ayaan u helay
Amin A. Axmed
12. Axdi Cusub hadduu yimid
Amin A. Axmed
13. Mugdigii idlaayoo
Mohamed Gurhan
14. Qoom loo bogay ahaada
Amin A. Axmed

- 
15. Iimaan buuxa ii yeel
Amin A. Axmed
 16. Badbaadshow Masiixow
Mahad H. Biriq
 17. Boqoroow na sii
Y. B. Xirsi
 18. Maalintii ba'nayd
Y. B. Xirsi
 19. Baadinimadu waa halis
Amin A. Axmed
 20. Rumaysadka lagu badbaado
Amin A. Axmed
 21. Barqadaan aqbalay
Amin A. Axmed
 22. Baqdini iga reebi mayso
Amin A. Axmed
 23. Rajadu way bislaataye
Amin A. Axmed
 24. Haddaba iimaan bedqaba
Amin A. Axmed
 25. Togdheer
Aweis A. Ali
 26. Jabhaddii Masiix
Y. B. Xirsi
 27. Xer la doortay
Y. B. Xirsi
 28. Dad yahow dhegaysta
Shaafici Ibraahim Faarax
 29. Dad la doortayoo
Y. B. Xirsi

-
- 
30. Kuwa dartaa innoo neceb
Amin A. Axmed
 31. In aad tahay Daa'imkii
Amin A. Axmed
 32. Haddaba waa iga dardaaran
Amin A. Axmed
 33. Inaad baqdin daraaddeed
Amin A. Axmed
 34. Samo doon waxaan ahay
Amin A. Axmed
 35. Rabiyoow Masiix
Y. B. Xirsi
 36. Rasuul sida wanaag
Y. B. Xirsi
 37. Sayidkaan u sheegnaa
Shaafici Ibraahim Faarax
 38. Samaalooow Sayid Masiix
Y. B. Xirsi
 39. Soorta xikmadda quuta
Amin A. Axmed
 40. Shaafici
Aweis A. Ali
 41. Noo dhalatay guul
Y. B. Xirsi
 42. Waxay dhaayuhuba arag
Amin A. Axmed
 43. Eebbaase dhammaan u naxay
Amin A. Axmed
 44. U fur dhaayihiyo qalbiga
Amin A. Axmed

-
- 
45. Dhanka midig kuwaad marin
Amin A. Axmed
 46. Illaa dhimashada xajiya
Amin A. Axmed
 47. Ciisaw Masiix
Y. B. Xirsi
 48. Ciidankii Masiix
Y. B. Xirsi
 49. Haddaad cabsi wayn dareento
Amin A. Axmed
 50. Marnaba ha ka baqan cadaawaha
Amin A. Axmed
 51. Dad baa mooda Ciise
Amin A. Axmed
 52. Wuuna camal qabaw yahay
Amin A. Axmed
 53. Xer aan cabsan baynu nahay
Amin A. Axmed
 54. Cishadii aan aqbalay isaga
Amin A. Axmed
 55. Intay goori goor tahay
Amin A. Axmed
 56. Daba gala Badbaadshaha
Amin A. Axmed
 57. Ii galay abaal wayn
Amin A. Axmed
 58. Gar bay igu tahay aniga
Amin A. Axmed
 59. Gaashaan difaac u ah
Amin A. Axmed

- 
60. Guushiyo badbaadada
Amin A. Axmed
61. Gacmaha intaan sare u qaado
Amin A. Axmed
62. Iblays gudayaase jira
Amin A. Axmed
63. Ila goco Groves
Aweis A. Ali
64. Injiilkaan faafinnaa
Aweis A. Ali
65. Dhammaan qoys baad tihiiin
Y. B. Xirsi
66. Qorshaha Rabbigeenu dhigay
Y. B. Xirsi
67. Xaqu qaali weeyee
Amin A. Axmed
68. Khayrka dhalashadiisaa
Amin A. Axmed
69. Masiix idin kaafin kara
Aweis A. Ali
70. Soomaalida loo shiree
Aweis A. Ali
71. Silicay ku mariyeen
Amin A. Axmed
72. Masiixa na doortayoow
Y. B. Xirsi
73. Hadday jawaabtu maya tahay
Amin A. Axmed
74. Gebagebaa la marayaa
Amin A. Axmed

75. Masiixinimaan ku dhiman
Amin A. Axmed

76. Kala mudan dharaaruhu
Amin A. Axmed

77. Anigu kaama maarmi karo
Amin A. Axmed

78. Dhalashadi Masiixee
Aweis A. Ali

79. Markuu dhici qiyaamuhu
Amin A. Axmed

80. Muuqday isaga oo nool
Amin A. Axmed

81. Masiixii i doortayow
Amin A. Axmed

82. Modrickers ma maqsheen?
Aweis A. Ali

83. Nasri Eebbe weeyaan
Amin A. Axmed

84. Waynow Masiix
Y. B. Xirsi


85. Wadaaddo xun baase kacay
Amin A. Axmed

86. Yay hii ka sugayaan?
Amin A. Axmed

87. Kaalay guusha hoo
Y. B. Xirsi

88. Waxaanse hubaa samada
Amin A. Axmed

89. Hunuuhunuu ma joogtee
Amin A. Axmed



90. Waxaan degay hir doog leh
Amin A. Axmed

91. Halkayse ka jirto midnimo
Amin A. Axmed

92. Nimcadaan ku hoos jiri
Amin A. Axmed

93. Hakad yaanu naga gelin
Amin A. Axmed

94. Soomaalida yaabtayee
Aweis A. Ali

HORDHAC

Buuggani waa kii saddexaad (volume 3) ee taxanaha sanadlaha ah ee *Maansada Masiixa*. Taxanahan oo ku bilowday in uu sanadkiiba laba jeer soo baxo ayaa iminka isku bedelay sanadle. *Maansada Masiixa* waxaa iska kaashada maansooleey Soomaaliyeed oo ka tirsan xerta Sayid Ciise Masiix. Ujeeddada taxanahan ayaa ah in dhaxal looga dhigo Kiniisadda Soomaaliyeed. Qasiiddooyinka ayaa kaalin mug leh ku leh caqiidada Masiixiyadda iyada oo Kitaabka Axdiga Hore iyo kan Cusubba ay xambaarsan yihiin qasiiddooyin iyo suugaan kale oo hodon ah.

Sharaf gaar ah ayay ii tahay in aan soo saaro taxanahan saddexaad aniga oo ah tifaftiraha taxanahan kana mid ah suugaanlayda Soomaaliyeed ee fanka aadka u jecel. Sida caadada ii ahba, waxaan ku leeyahay buuggan dhowr qasiiddo oo aan ku darsaday. Waxaan rajaynayaa in dhammaan qasiiddooyinka buuggan ku xusan ay anfacaan Masiixiyiinta Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.

Wixii gaabis ah ee buuggan laga helo waxaa uun masuul ka ah aniga oo ah tifaftiraha mana jirto cid ila wadaagta eeddaas. Waxaan ka codsanayaa akhristayaasha in ay iisoo gudbiyaan wixii talo iyo tusaale ah oo taxanahan lagu wanaajinayo. Sida Soomaalidu ku maahmaahdo, hal fari fool ma dhaqdo. Marka dadka Eebbe is kaashadaan waxay dhali karaan miro aad u wanaagsan oo aad waxgal u ah.

Waxaan u mahadnaqayaa Masiixiyiinta Soomaaliyeed ee soo gudbiyay qasiiddooyinka buuggan dhex ceegaaga si ay dhaxal uga tagaan Kiniisadda Soomaaliyeed. Waxaan walaalahaas ku leeyahay Eebbe ha idinka abaalmariyo deeqsinimadiina. Waxaan ku casuumayaa Masiixiyiinta Soomaaliyeed ee hibada u leh suugaanta in ay soo gudbiyaan wixii qasiiddooyin iyo suugaan kale oo anfac u leh Kiniisadda Soomaaliyeed si loogu soo saaro buugaagta soo socota. Waxaad suugaantiina noogu soo gudbin kartaan email-kan ah: amazingwisdom@gmail.com

Aweis A. Ali

QIRASHADA IIMAANKA

Waxaan rumaysannahay Eebbaha Aabbaha ah
Kaas oo ah Qaadirka abuuray samada iyo dhulka
Iyo Ciise Masiix oo ah Inankiisa qura iyo Sayidkeenna
Kaas oo ka dhashay Ruuxa Qudduuska ah
Waxaana dhashay Maryan oo bikra ah
Waxaa uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos
Iskutallaabta ayaa lagu qodbay, wuu geeriyooday, lana aasay
Wuxuu galay Goobtii Dadka Geeriyooday
Kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay maalintii saddexaad
Wuxuu aaday samada oo uu ku negaaday isaga oo ku sugan
Gacanta midig ee Eebbaha Aabbaha Qaadirka ah
Halkaas ayuuna ka iman doonaa si uu u xukumo
Kuwa nool iyo kuwa dhintayba.
Waxaan rumaysannahay Ruuxa Qudduuska ah
Kiniisadda Ciise Masiix ee caalamiga ah
Jameecada awliyada ah, cafinta dembiga
Sarakicidda jirka iyo nolosha weligeed ah

Waxaa Turjumay Aweis A. Ali

U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA

Eebboow Ilaahow, kuwa aad u yeertay
In ay Eraygaaga, Soomaalida u geeyaan
Ku adeecay adigee, ammarkaaga raacay
Howshu waa mid adagoo, sahal aan ahayne
Afka waxay ka doonaan, uurka uga baahdaan
Eebboow Allaw sii, adey kuu adeegaan

Agab waxay u baahdaan, yaaney waayin Eebboow
Ka ilaali cuduroo, caafimaad adigu sii
Cidla yaanay aragoo, abidkood ay ciishoon
Ehel iyo asxaab sii, halkii ay tagaanba
Afka markay furayaan, hadal adigu oo hag
Axadkii maqlaaba, ha raaco Injiilka

Kuwa Eraygaaga, raaca oo rumeeya
Oo towbad keena, bartana Injiilka
Waa xertaadi adigee, garabkood Allow gal
Ka xijaab shar oo idil, oo ku xooji Ruuxa
Miro badan Allow sii, ku addeeca adigoo
Eraygaaga baraya, Soomaali oo idil

Waxaa curiyay Aweis A. Ali

BARYADA RABBIGA

Matayos 6:9-13

Aabbahayaga jannada ku jiroow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirrabaadda ha noo kaxaynin, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. AAmin.

SABUURKII NEBI DAA'UUD

Sabuur 23:1-6

Kanu waa sabuur Daa'uud tiriyey.
Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.
Wuxuu i fadhiisiiyaa doog qoyan dhexdiis,
Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.
Naftayda wuu soo celiyaa.
Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.
In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,
Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,
Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.
Cadaawayaashayda hortooda waxaad igu diyaarisaa miis,
Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa.
Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,
Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE

Baxniintii 20:3-17

Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.
Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiiyayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya.
Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.
Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo

dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey maalintii sabbtida ahayd oo quduus uga dhigay. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.

Waa inaanad qudh gooyn.

Waa inaanad sinaysan.

Waa inaanad waxba xadin.

Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,
Dadka dbulka oo dhammon, Rabbiga u gabya.
Rabbiga u gabya, oo magiciisa ammaana,
Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.
Ammaantiisa quruumaba dbexdooda ka sheega,
Oo shuqulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka dbex sheega.*

Sabuur 96:1-3

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,
Waayo, isagu wuxuu sameeyey waxyaalo yaab badan,
Gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa qudduuska abuna waxay keeneen badbaado.
Rabbigu wuxuu dadka ogeysiyeey badbaadadiisii,
Oo xaqnimadiisiina wuxuu bayaan ugu muujiyey quruumaba hortooda.
Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil,
Dadka dbulka darfihiisa jooga oo dhammu way wada arkeen badbaadinta Ilaabeenna.
Inta dbulka joogta oo dhammay, Rabbiga farxad ugu qayliya,
Dhavaaqa, oo farxad ku gabya, oo ammaan ku gabya.
Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo kataarad haysta,
Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.
Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga dhawaaqiya
Turumbooyin iyo buunan.
Badda iyo waxa ka buuxaaba ha guuxeen,
Dunida iyo kama dbex deggan oo dhammuna ha dhawaaqeen,
Webiyadu ha sacbiyeen,
Oo buurubuna dhammaantood farxad ha kaga gabyeen Rabbiga hortiisa,
Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dbulka xukumo,
Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo,
Dadyowgana caddaalad.*

Sabuur 98:1-9

...laakiinse Ruxu ha idinka buuxsamo. Iskula hadla sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa, idinkoo gabayaya oo Rabbiga qalbigiinna ka ammaanaya.

Efesos 5:18b-19





ERAYGAAGU WAA NOLOL

Amin A. Axmed

Eebow Allahayow
Adiga ruux ku aamina
Isku kaa halleeya
Amban maayo weligii
Arxan badane inaad tahay
Jecel aadmigoo idil
Kuwa aan ogayn baan
Bar Injiilka leeyahay

Eraygaagu waa nolol
Wax u taraya uunkee
Rabbow adaa awoodlee
Iftiinkiisa gaarsii
Inta lunsan dhammaantood


Ilaah jira inaad tahay
Ruux kastee aqoonsada
Ku addeeca kelidaa
Ma hallaabo abidkii
Xaqa kuwa ka iishee
Iblays marin habawshaan
Ilayskii badbaadada
Mar uun eega leeyahay

Eraygaagu waa nolol
Wax u taraya uunkee
Rabbow adaa awoodlee
Iftiinkiisa gaarsii
Inta lunsan dhammaantood

UMMAD BAYNU NAHAY

Y. B. Xirsi

Ummad baynu nahay
Eebbe doortayoo
Erayada Ilaah



Urka loo dhex dhigay

Edeb lagu dhaqmiyo
Asluub iyo xishood
Iimaan la hubo
Iftinkeenu yahay

Adoon aarsanayn
Jawaabaha Ilaah
Ayaa siinayee
Eedaha cafiya

Dad is caawiyoo
Is jeclaadayoo
Idilkeed xumaan
Albaabada u xidhay

Kuwa idin dhibee
Adduunkaa la taga
Afxumada dhammaan
Idilkeed Cafiya

Adoon aarsanayn
Jawaabaha Ilaah
Ayaa siinayee
Eedaha cafiyaa


ERAY BAAN SIDNAA

Y. B. Xirsi

Eray baan sidnaa
Aadamuhu dhammaan
Uu u baahan yee
Iftinkiisa raac

Ergadii Ilaah
Uu soo diraa
Kuu imanaysee
Ajiiboo addeec

Awoodlaw Masiix
Ammarkuu na faray
Waan ajiibnayoo



Waan ammaanaynaa

Ayaantuu Masiix
Uu iman lahaa
In yar baa hadhee
U imoow rumees

Nolol aan dhammaan
Iftiinkiisu baxo
Aad ku waartidee
Kaalay u imow

Awoodlaw Masiix
Ammarkuu na faray
Waan ajiibnayoo
Waan ammaanaynaa

EEBBAAN WADA JECELNAHOO

Y. B. Xirsi

Anagu sacab kaan tunnaa
Ammaan baan qaadaynaa
Eebbaan wada jecelnaahoo
Xamdida u qirraa isaga

Amniyo iimaan la huboo
Nimcada uu na siiyay iyo
Iftiinkan baxaaya daya

Annagu ubad baanu nahay
Rabbiga wada aaminoo
Isagu Aabbohooda yahay

Jacayl la isku aaminiyo
Ilaah nabad buu rabaa
Arladu ku hagaagaysaa

Midnimo aynu doonanee
Intaad isu soo baxdaan
Xumaha iska wada cafiya

Annagu ubad baanu nahay
Rabbiga wada aaminoo
Isagu Aabbohooda yahay

EEBBAHEEN KU DHAWR

Y. B. Xirsi

Aways ina Cali¹
Eebbe doortayoow
Arintaad waddaa
Way Aloosantee
Eebaheen ku dhawr

Abwaanadii dhammaan
Waad ururisoo
Xigmaddii Ilaah
Uu afkooda dhigay
Waad iftiimisee
Eebbaheen ku dhawr

Ammaantuu Ilaah
Unaga mudnaa
Abwaanadu qoreen
Yaad ururisee
Eebbaheen kud hawr

Eraygii Ilaah
Maanso lagu xafido
Adigaa qoroo
Ku abaal lahee
Eebbaheen ku dhawr

Awaysow adeeg
Aan u baahannahay
Ayaad keentaye
Eebbaheen ku dhawr

Hadyadaha Ilaah
Walaalaha in badan
Uu siiyay baad
Uunka siisaye
Eebbaheen ku dhawr

¹ Aweis A. Ali, tifaftiraha buuggan.



AMBADNIMO KAA ILAALSHAY

Amin A. Axmed

Hadduu Rabbi kuu arxamay
Ambadnimo kaa ilaalshay
Intuu indhahaagii furay
Iftiinkiisana ku tusay
Nimcaa kugu dul ooganee
Iimaan li'i yay ku lumin

Abaal ruux loo galoo
Alxamdu lillaah yiraa
Adigu weligaa ahaw

Ogow dabarkii adkaa
Iblays kugu giijin jiray
Hadduu Eebbe kaa furfuray
Ku baray Injiil xaq ah
Adduunyadu yay ku dagine
Aqoonta gaashaan ka dhigo

Abaal ruux loo galoo
Alxamdu lillaah yiraa
Adigu weligaa ahaw

IIMAANKA WEEYAAN

Amin A. Axmed

Xikmaddiyo aqoonta
Kan u oomanaayoow
Cutubyada Injiilka
Akhri hadiyo goorba

Barakada Ilaah baa
Kuu noqon il aan gurin
Iyo aaran iyo nolol

Waana hubka iblayskiyo
Sharta kaa ilaalinoo

Aakhiriyo adduunba
Ku gargaara abidkaa

Naarta lagu asqoobiyo
Cadaab aan idlaanayn
Waxaa kaa afxiri kara
Waa awoodda Eebbee

Ruux addeeca noqo oo
Fulin amarradiisoo
Dhammantood adkeeya

Iimaanka weeyaan
Waxa lagu aflaxayoo
Ayaantaa qiyaamana
Anfac u leh dadkoo idil

KUWAA INKIRAAYA YEELKOD

Amin A. Axmed

Waxaa jiray Erayga bilowgii
Eebbuuna la jiray isagu
Wuxuuna ahaa Ilaah

Koonkana idil ahaantii
Iyo uunkuba dhammaantii
Xaggiisaa lagaba uumay
La'aantii lamaba oogin
Dartii baase loo abuuray

Inaan caabudo anigu
Masiixa addeeco baan
Xaqiyo u arkaa runtee
Kuwaa inkiraaya yeelkood

Waxaa jiray Erayga bilowgii
Eebbuuna la jiray isagu
Wuxuuna ahaa Ilaah

Ifkana waxaa uu u yimid
Inuu aadmiga dhammaan
Wixii ay eed galeen
Jacaylkiisa aawadii



Dushiyo oogada u rito

Inaan caabudo anigu
Masiixa addeeco baan
Xaqiyo u arkaa runtee
Kuwaa inkiraaya yeelkood

XAQA KUWA KA IISHOW

Amin A. Axmed

Aayadaha macaanee
Ku dhex jira Injiilka
Ruuxa akhrista mooyee
Inta kale aqoon wacan
Uma laha Ilaahay

Waase arrin la yaab leh
Aadanahuna weli baran
Rabbi Erayadiisii
Idilkood runta ahaa
In inuu u yeelaba

Xaqa kuwa ka iishow
Eedahaad gelayaan
Ayaantaa qiyaamaha
Laydinka abaalmarin

Allahii ku uumay
Oo uurka hooyada
Kugu soo arsaacaq
Ayaad amarradiisii
Oggolaynba maanta

Adigoo itaal daran
Aan lahayn awood baad
Isla wayni awgeed
U inkirtay Masiixii
Dhabtii kuu arxami laa

Xaqa kuwa ka iishow
Eedahaad gelayaan
Ayaantaa qiyaamaha
Laydinka abaalmarin

ADDUUN LAGU WAARI MAAYO

Amin A. Axmed

Masiixu wuxuu na faray
Injiilka wanaagga sida
Inaan ku wacdinno dhammaan
Dunida weli aanan maqal

Xilligu waa gebagebee
Wakhtigu inta aanu dhicin
Wahsiga baas yuu na lumin

Adduun lagu waari maayo
Wed baa noolaha sugaayee
Si waafiya aan u gudanno
Waajibka ina saaran abid

Warhoy innagoo diyaar ah
Weliba daahirnimo ku sugan
Inaan soo jeedno weeyaan
Rabbiga soo wada dhowayno

Saacaddu way taagan tahay
Caddayn waxaa noogu filan
Waxyaabaha dhacaya oo idil

Adduun lagu waari maayo
Wed baa noolaha sugaayee
Si waafiya aan u gudanno
Waajibka ina saaran abid

WAXAANSE AYAAN U HELAY

Amin A. Axmed

Iblaysku miduu anbiyay
Ilaah ka fogaaday baan
In badan soo ahaan jiree
Waxaanse ayaan u helay
Aroor wacan inuu Rabbigu
Intuu ii furay indhaha
Ilayskii xaqaba i tusay

Eebbaa iga mudan ammaan
Urkana uga mahadnaqaa
Afkayguna wuxuu qiraa
Inuu ii galay abaal
Abidkay aanan gudi karayn

Aqoon darro aawadeed
Anigoo jidkii Eebbahay
Inaan ku arooro nacay
Iftiin sow iima iman
Injiilku xambaarsan yahay
Dabeed erayada ku qoran
Runtana sow iguma hagin

Eebbaa iga mudan ammaan
Urkana uga mahadnaqaa
Afkayguna wuxuu qiraa
Inuu ii galay abaal
Abidkay aanan gudi karayn

AXDI CUSUB HADDUU YIMID

Amin A. Axmed

Axdi Cusub hadduu yimid
Waa mid oofin kii hore
Ku kalena inuu iman
Maaha qorshaha Eebbee
Aadmiga qaar waxaa jira
Intuu iblaysku lumiyay
Quursada Injiilkaba

Haddaannaan ogaysiin
Ehelkiyo dadkoo idil
Inuu yahay Masiixu
Jidka Ilaahay loo maro
Ololaheennu waa been

Anbiyadii loo soo diray
Ummadaha dhammaantood
Inay waddadii Eebbiyo
Ku hagaan iftiinkaba
Yaxyaa ugu dambeeyay

Isagase gadaashii
Yey inkaaran baa timid

Haddaannaan ogaysiin
Ehelkiyo dadkoo idil
Inuu yahay Masiixu
Jidka Ilaahay loo maro
Ololaheennu waa been

MUGDIGII IDLAAYOO

Mohamed Gurhan

Masiixoow ku aaminoo
Amuurteey ku saartee
Indhaha kaama leexshoo
Gadaal eegi maayee
Indhaha kaama leexshoo
Gadaal eegi maayee
Mugdigii idlaayoo
Iftiin baad na siisee
Jacaylkaada awgii
Badbaadaannu aragnee

Waxaan la ooyaa
Waa Ilaah jacaylkiis
Adigaan ku doortoo
Arwaaxdey ku raacdee
Adigaan ku doortoo
Arwaaxdey ku raacdee
Mugdigii idlaayoo
iftiin baad na siisee
Jacaylkaada awgii
Badbaadaannu aragnee

Naftaa kuu oomane
Araggaada doontee
Wadnaha kuu olalayoo
Eraygaaga deeqee
Wadnaaha kuu olalayoo
Eraygaaga deeqee
Mugdigii idlaayoo
Iftiin baad na siisee
Jacaylkaada awgii
Badbaadaannu aragnee

Badbaadaannu aragnee
Badbaadaannu aragnee



B





QOOM LOO BOGAY AHAADA

Amin A. Axmed


Beri hore Qorniinkaa
Bayaan noogu sheegay
Belaayada dhacaysee
Baabi'isa uunkaba
Inuu xilligu buuxsamay
Yay ka bixin tilmaaniyo
Baaq digniin xambaarsani
Ee inta aanu bigilkiyo
Buunkuba dhawaaqin
Bulshadaan jeclaayay
Qoom loo bogay ahaada

Siduu yiri Badbaadshuhu
Waxaa jiraya barayaal
Iyo nebiyo been ah
Soo baxaya dabadii
Bidcanimo daraaddeed
Intay baadiyoobaan
Qaar badan halligayee
Ee dadyahaw baraaruga
Iska jira cilmiga baas
Raadkiisu ba'an yahay
Iyo bohosha naareed

IIMAAN BUUXA II YEEL

Amin A. Axmed

Adigay badbaadshoo
Xaqii ii bidhaanshay
Boqortooyadaadii
Igu yiri ku soo biir
Anigoo aan mudan baad
Ballanqaadka noloshiyo
Farxad badan i siiyay



Rabbow mahad ballaaran
Abid baaqi noqotaan
Bogga kuugu hayaayee
Iimaan buuxa ii yeel

Anoo been run mooday
Dhalanteed u bogaya
Adigaa i baantoo
Laabtayda barax tiray
Haddaad biyihi nolosha
Boqorow i siin lahayn
Kol horaan baqtiyi lahaa


Rabbow mahad ballaaran
Abid baaqi noqotaan
Bogga kuugu hayaayee
Iimaan buuxa ii yeel

BADBAADSHOW MASIIXOW

Mahad H. Biriq

Badbaashow Masiixoow
Barahii adduunkow
Baraarkii Ilaahow
Darteen loo bireeyoow
Dembi naga badbaashow
Boqortooyo wacan iyo
Ballan qaad na siiyow
Beertii Janada iyo
Beel wacan na siiyow
Boqorkeyga wacan iyo
Bixiyaheyga baad tahay

Beesha oon isbixin karin
Baroordiiq ka yeertoo
Balaayada adduuniyo
Ba'ayey ka yeertoo
Boqor baa u soo kacay
Badbaadshoo innoo yimid
Baaqigeena Eebbaa
Heshiisiiyay beeshii
Baraaraa la helayoo
Beel rumaysad baan nahay



Bustaankii janadiyo
Ballankii Ilaah
Aadam uu burburiyoo
Beer Ceeden lumiyay
Ayu soo birbiriyo
Ballan qaad nasiyo
Beladii ibliiskiyo
Naarti naga badbaadshoo
Bishaarada na siiyay
Na bogsiiyay innagee
Barras iyo juudaan
Basanbaas midkii qabay
Isagaa bogsiiyoo
Baybalkaaga wacan baan
baaqiisa raacnoo
Baraarkii Ilaahow
Loo bireeyay dembigii
Bixiyaheygi baad tahay

BOQOROOW NA SII


Y.B. Xirsi

Dad la boobayoo
Been loo dhigoo
La baleeyay baan
Baadi goobaynee
Boqoroow na sii

Ruuxbad baadiyoo
Soobixinkaraan
Kaaga baaqanee
Boqoroow na sii

Sharkan buuxsamee
Dadka bohol ku riday
Aan ka baydhinee
Birmadkaaga wayn
Boqoroow na sii

Injiilkoo la baro
Yay u baahantee
Aan badbaadinee
Ruux na buuxiyaa
Boqoroow nasii



Dad badbaada iyo
Midho soo baxaan
Kaaga baahannee
Kuu baryootannee
Boqoroow na asii

MAALINTII BA'NAYD

Y. B. Xirsi

Maalintii ba'nayd
Cadaw beegsadee
Baabacada musbaar
Baasha waran la suray

Xasuus aan ba' ayn
Boog wadnaha ku taal
Boqorkeeni maray
Bulshooy raaca hee

Barwaaqada Masiix
Noogu baaqayiyoo
Guusha beegsadoo
Beeshiisa noqoo

Dadkoo wada bukoo
Dhakhtar baanta iyo
Bogsiiyaba lahayn
Baahi wayn la qabo

Boqoroow Masiix
Yaa badbaadiyoo
Kuwii wada bogsaday
Baybalkay ku taal

Barwaaqada Masiix
Noogu baaqayiyoo
Guusha beegsadoo
Baashiisana imow



BAADINIMADU WAA HALIS

Amin A. Axmed

Bayaankii injiilkee
Rabbi kuugu baaqiyo
Adoo helay badbaadada
Inaad cilmigi baasiyo
Baabi'ii ku noqoto
Ha u bogin naftayday

Xaqa inaad ka bayrtood
U bareerto gudcurkiyo
Baadinimadu waa halis

Boqorkii ku doortee
Dhabtii bohosha naartiyo
Kaa xoreeyay beladii
Ha baal marin jidkiisee
Ammaantiisa badiyoo
Baryadana ha moogaan

Xaqa inaad ka bayrtood
U bareerto gudcurkiyo
Baadinimadu waa halis

RUMAYSADKA LAGU BADBAADO

Amin A. Axmed

Rumaysadka lagu badbaado
Boggiyo laabtuu ka iman
Hadduu bushimaha korkoodiyo
Uu yahay afka baarkii waa halis

Munaafaqnimadu waa belo
Ba' baa runtii laga dhaxlaayee
Haddaba adoon laba boglaynin
Si buuxdo u raac Ilaah

Rabbiga nimcadiisa badan
Garasho bay u baahan tahaye

Injiilka haddaan la baran
Iimaanku bar buu noqdaaye

Rumayn hawl lagu barbaarin
Ogow bakhti bay u dhigantaa
Haddaba baraxtira naftiinnoo
Hammiga dunidana ka baxa

BARQADAAN AQBALAY

Amin A. Axmed

Baraarkii Ilaahay
Barqadaan aqbalay baan
Nolol lagu baraariyo
Farxad buuxda helayoo
Aan u bayray waddaduu
Xaqu iiga bidhaamay

Been kuma hadlaayee
Waxaa is beddelay dhaqankii
Bahdilay naftaydoo
Caasinimo i badi jiray

Maantase barwaaqiyo
Bashbash baan ku noolahay
Sharna kama baqaayo
Waana Boqorka mahaddii

Badbaadshaha naftaydii
Rajo aan u bogay iyo
Ballanqaadka siiyay
Ayaa boogahaygii
Iga wada bogsiiyoo
Noqday Bixiyahaygii

Xaqii laygu beeraa
Belo iga xijaaboo
Nolol aan u baahnaa
Bartankeed i geliyee

Maantase barwaaqiyo
Bashbash baan ku noolahay
Sharna kama baqaayee
Waana Boqorka mahaddii

BAQDINI IGA REEBI MAYSO

Amin A. Axmed

Rabbow biyahaa nolosha
Dhabtii lagu oon baxaayiyoo
Adaa barakada i siiyay
Adaa halis iga badbaadshoo
Beloo idil iga xijaabay
Haddana dhayay boogahaygii

Ciisow Boqorkaan jeclaayow
Intaad barbarkayga joogto
Inaan baahiyo Injiilka
Baqdini iga reebi mayso

Adaa runta igu barbaarshay
Baaddilkii iga soo kaxeeyay
Iimaan buuxana i siiyay
Adaa bedankaygii mayray
Laabtaydii jacayl ku beeray
Ka bayr igu yiri xumaha

Ciisow Boqorkaan jeclaayow
Intaad barbarkayga joogto
Inaan baahiyo Injiilka
Baqdini iga reebi mayso

RAJADU WAY BISLAATAYE

Amin A. Axmed

Badbaadadii la helay
Bilaash haw malaynina
Beri hore Masiixaa
Naftiisii u bixiyoo
Boqortooyadiisii
U soo bandhigay aadmiga

Kol haddaan ku biirnay
Ballanqaad sugayno
Waa bishaaro waynee
Aynu mahad ballaaran
Boqorkeen u celino

Ciise wuxuu na baray baa
Belaayada adduunkiyo
Naga reebay wixii baas
Beelaha dhexdoodana
Bulsho laga tilmaamoo
Loo bogay inaga dhigay

Kol haddaynu baraduu
Ku sugnaa Badbaashahu
Maanta beegsanayno
Rajadu way bislaataye
Bal aan samir ku dhawrno

HADDABA IIMAAN BEDQABA

Amin A. Axmed

Rumaysadku wuu buraa
Haddaan camal lagu barxayn
Waxay badataa nimcadu
Kolka baaqyadii Rabbiga
Bayaan loo fulinayoo
Bulshadu isku duuban tahay

Haddaba iimaan bedqaba
Jacayl aan baaba'ayn
Boqorku idin siiyo weligiin
Ka barya maantaba idinku

Haddaan laysu beernaxayn
Badbaadadu waa qabyee
Barbaarinta waxaa kobciya
Ballantii Eebbe lagu hantaa
Kolka loo barto si qumman
Injiilka na haga beryahan

Haddaba iimaan bedqaba
Jacayl aan baaba'ayn
Boqorku idin siiyo weligiin
Ka barya maantaba idinku



T



TOGDHEER

Aweis A. Ali

Sideed iyo toban ayaan jiray
Markaan talo saartay Eebbe
Masiixa tubtiisa raacay
Haddoon kontonkii talaabay
Tiradaas labo iiba raacday
Tu aan garanaayay waagaas
Welina aan iga tirmaynin
Tiraab badan aan ku sheegay
Ayaan maantadan tixayne
Tolow iisoo dhawaada

Togdheer waxaa lagu yaqaanaa
Dad taajiray oo tacliin leh
Tiriigga sidiis iftiima
Tororog aan lagu aqoonin
Iyaga oon tuugtamaynin
Dalkeenna tabar xoreeyay
Taageero nagu manaystay
Soomaalidi taah u diiday
Tolkoodu wada jeclaaday
Masiixana toos u raacay

Taariikhda ayaa xusaysa
Soomaali tabaabuleeyeen
Tii ay ku dhigeen Talyaani
Tacsir Faransiiska saaray
Ingiriis tabar ku saaray
Itoobiya aan ka tegin
Kenya taliskeeda diiday
Waxay tayadaas ku gaareen
Masiixay talada saarteen
Injiilkiisay ku tooseen

Togdheer Eebboow ka soo saar
Tafiir badan oo ku raacda
Taqinimo lagu yaqaanoo
Tastuur nagu wada mideeya
Kolkaas taaj yaan u saari
Iyagaa noo talin dhammaantood
Ilaah bay talada saaran
Tawreed iyo Injiil na bari
Taxriifna naga ilaalin
Si aan Ciise ugu tixnaanno



J





JABHADDII MASIIX

Y.B. Xirsi

Jabhaddii Masiix
U jiheeyayeey
Xaq ku joogsadoo
Sharka joojiyaay

Jidkiisii wacnaa
Wuu jiraa ilayn
Ku jarmaada oo
Jacayl muujiyaay

Halgan baa jiree
Jeeniqarta oo
Soo jeed habeen
Xaqnimada jiroo

Dhufaysyada jinkiyoo
Shaydaan ku jiro
Aynu jebina ee
Juhdi adag u bixii

Naf lagaa jariyo
Jidh xanuun la bado
Haka joogsanine
Jabhaddaay naf hura

Halgan baa jiree
Jeeniqarta oo
Soo jeed habeen
Xaqnimada jiroo



X





XER LA DOORTAY

Y. B. Xirsi

Xer la doortayoo
Xaqnimada la baray
Ruuxa lagu xafiday

Xabsiyada iblays
Dadkeena ku xidhan
Xaqa sii la yiri

Jacayl xiisaliyo
Nabad lagu xasilo
Xeerkoodu yahay

Xidid iyo tol iyo
Xigtadaay dhammaan
Aynu xoog hellee
Xertan kaalay noqo

Xamdi baan wadnaa
Xaasid maan nihine
Xaqaan sheegaynaa

Xoriyad loo hadliyo
Xuquuq baan rabnaa
Xurmaddeenu tahay

Xasad naloo dhigiyo
Xarbi iyo dagaal
Run ma xidhi karaan

Xidid iyo tol iyo
Xigtadaay dhammaan
Aynu xoog hellee
Xertan kaalay noqo



D





DAD YAHOW DHEGAYSTA

Shaafici Ibraahim Faarax

Dadyahow dhegaysta
Rabbi Daa'imka ayaa
Dusha naga ilaalshoo

Na daadihinahaayoo
Dembi dhaaf na siiyoo
Dariiqii qunnaayoo
Daaimkeen uu soo diray
Deganaan u haynaa
Dulli naga xoreeyay
Dad yahow maqaloo
Khayrkaa usoo dida
Daliilkayga eegoo
Rabbi Daa'im raaca
Dulmigana diida
Daadah ugu imaada
Ku doogsada nabadoo
Qalbigiina yaa degi
Dalka yaa ku doogsan
Diintii Masiixee
Dembi dhaafka lahayd
Yaa duggaalsi mudanee
Damiir laawe mooyee
Nin kaleba ma diidee
Dirac iyo geesiba
Khayrkaa durduuray

DAD LA DOORTAYOO

Y. B. Xirsi

Dad la doortayoo
Dambi laga dhaqoo
Kuu dabbaldegee
Daa'im mahadda hoo

Dunidoo madaw
Dambiyadu halaag
Cuduradu dilaan
Daweeyaa u yimiid

Waad na deeqdayoo
Waad na daajidee
Kaalay soo dagoo
U imow dadkaa

Xoog na daafacoo
Na daryeelay baa
Na dultaaganoo
Waanu diirsanaa

Dulmi iyo xumaan
Kuwa nala damcana
Waan dulqaadanaa
Duco ugu darnaa

Waad na deeqdayoo
Waad na daajidee
Kaalay soo dagoo
U imow dadkaa


KUWA DARTAA INNOO NECEB

Amin A. Axmed

Doonistaadu siday tahay
Inaan dunida gaarroo
Injiilkana la doonno
Diyaar baan u nahaye
Rabbow xoog dumayniyo
Xikmad noogu sii deeq

Kuwa dartaa innoo neceb
Ee iblaysku duufsaday
Dabbinnaday dhigaaniyo
Shartoo idil inaga deyr

Duhur iyo habeenba
Inaan socod ka daalin



Daruufaha adkaadana
U yeelano dulqaadka
Waa dardaarankaagee
Rabbiyow na daadihi

Kuwa xumaha doortee
Dilka rumaystayaasha
U degdegaya weligood
Naga demi shartooda

IN AAD TAHAY DAA'IMKII

Amin A. Axmed

Ma moogi inaad dartay
Sidaad ii daahirin lahayd
Dhiiggaagii u daadisayoo
Runtii dembigaan lahaa
Dushaada ku qaaddayoo
Haddana iigu deeqday nolol

Anigu kama daalo abid
Inaan dadka hortii ku qiro
Inaad tahay Daa'imkii
Badbaadin u yimid dunida

Jacayl aan duugba noqonayn
Adaa ila doonay shalay
Weliba shartu dawgii ay tiil
Inaan ka durkoon ka tago
Laabtaydii ku daabacoo
Dariiqo la hubo i tusay

Anigu kama daalo abid
Inaan dadka hortii ku qiro
Inaad tahay Daa'imkii
Badbaadin u yimid dunida

HADDABA WAA IGA DARDAARAN

Amin A. Axmed

Miyay duniduba ogayn
Inuu dembi culusba yahay
Xaqoo laga wada durkoo
Weliba la dafiro Ilaah

Ruuxii Daa'im inuu inkiro
Dadaal ugu sii jirow
Adumbaa is dullaynayoo
Meel daran u hayaamayee

Haddaba waa iga dardaaran
U soo дума xagga Injiilka
Jidkiyo idiin tusin dariiqii
Rabbigu aadanaha u dooray

Miyuu dadkuba fahmayn
Dijaallo inay kaceen
Aadmiga inay duufsadaan
Dantoodu ku kooban tahay


Ruuxii inuu daba socdana
Maantaba damac uga jirow
Ogow adigays deldelay
Naftaada ku shiday dabkee

Haddaba waa iga dardaaran
U soo дума xagga injiilka
Jidkiyo idiin tusin dariiqii
Rabbigu aadanaha u dooray

INAAD BAQDIN DARAADDEED

Amin A. Axmed

Dunidani dhexdeeda
Kan ku dafiray Ciise
Waa ruux dembiile ah
Oo aan daarta aakhiro
Qiil uu isku difaaciyo
Ay dood u furan jirin



Waase iga digniinee
Haysku dayina abidkiin
Inaad baqdin daraaddeed
Inkirtaan Dabiibkii
Shalay idiin dawceeyay

Iimaanku waa dahab
Duunyo lagu helaynee
Waase deeq Ilaahay
Dadka uu u fidiyoo
Darajada qudduusnimo
Dabeed lagu hantaaye

Ku dadaala weligiin
Daacad inaad ahaataan
Idinka oo diyaar ah
Sooba dego Masiixii
Idiin doortay waa hore


SAMO DOON WAXAAN AHAY

Amin A. Axmed

Samo doon waxaan ahay
Uu Masiix u soo diray
Dunidani hallowday
Weli Injilkaa soo degay
Dulucdiisi aan garan
Daryeelkana u baahan

Kollay inaan dawaafoo
Daafaha adduunyada
Dadka jooga oo idil
Xaqa daaha uga rogo
Kama daalo aniguna

Dembigiyo xumaantaan
Uunka uga dig leeyahay
Bal inay dariiqiyo
Dawga toosan raacaan
Si ay dulligii haystay
Durba uga xoroobaan



Ducada iyo soonkaan
Ku dagaal gelaayaa
Derbigii iblayskana
Daa'im hadduu yiraahdo
Inaan dumiyo weeyaan



R





RABIYOOW MASIIX

Y.B. Xirsi

Bulshadoo rafaad
Been lagu raroo
Dhagax reer dhigteen
Shanta goor ragcado
U diraa rukuuc

Rajo lagu farxiyo
Raasamaal la hubo
Nabad raaxo taal
Runtii aan la heliin

Rabbiyoow Masiix
Hadyad Ruux Qudduus
Ku raaxaysannoo
Waan riyaaqaynaa

Ruux ku doonayyo
Rabbi kuu dhawbaa
Raaxo kuu hayee
Injiil raadsadaay


Ehelkaan rabniyo
Reeraheenniyoow
Aad raaxaysatide
Rumeeya Masiix

Rabbiyoow Masiix
Hadyad Ruux Qudduus
Ku raaxaysannoo
Waan riyaaqaynaa

RASUUL SIDA WANAAG

Y. B. Xirsi

Rasuul sida wanaag
Rabbigii dirsaday



Injiil lagu raraa
Reerkeeni yimiid

Rafaadkii jiriyo
Been nagu rarayd
Waa ka raysanoo
Raaxaysanaa

Rabbiyoow Masiix
Yaan rumaysanoo
Ramad baa dhaloo
Ruux baa na haga

Rasamaal la hubo
Janno raaxo taal
Rabbibaa hayee
Kaalay oo rumee

Roobkooda iyo
Risiqoo bataa
Rumeeyuhu heliye
Ciise kaalay raac

Rabbiyow Masiix
Yaan rumaysannoo
Ramad baa dhaloo
Ruux baa na haga



S



SAYIDKAAN U SHEEGNAA

Shaafici Ibraahim Faarax

Waa nala sirayoo
Sayidkay naga duween
Socodkay naga xireen
Sasab bay na gelsheen
Soomaali oo dhanba
Siday rabeen na yeeleen
Sayidkay naga xireen
Siyaaray na gelsheen
Suuq bay na dhigeen
Sicir aan naf lahay
Saab nagu rideenoo
Siyaaraday xireenoo
Soomaaliyoo dhan
Sirtoodii garanoo
Sidii Ilaah noqotoo
Sayidkaa innoo yimid
Saddexdii noo sheegoo
Suurad baanu haynaa
Sayidkow noo qaboo
Sasabkaa naga bixi
Soomaali oo dhan
Wixii inna siraayaba
Sayidkaan u sheegnaa

SAMAALOOW SAYID MASIIX

Y. B. Xirsi

Samaaloow Sayid Masiix
Nimcada aadna siisay iyo
Wanaag baad noo siddaa

Xumihi la sameeyay iyo
Dunuubtaad saartayoo
Sinaan nimco noogu deeq

Cadawga sooryeeya oo
Wanaag u sameeya abid
Waliba samra buu na yiri

Siduu u saxnaa isagu
Inana aan samaana oo
Sayidka mahaddiisa sii

Safkii Rabbi doortayoow
Iftiin la siraada iyo
Tusaalaha saaka bixii

Cadawga sooryeeya oo
Wanaag u sameeya abid
Waliba samra buu na yiri

Shaydaanku sir buu wataa
Suryada dabin kuu dhigaa
Sun daran kugu saydhayaa

Eraygu seef buu yahee
Waxay sahaydeenu tahay
Walaal soon iyo salaad

Cadawga sooryeeya oo
Wanaag u sameeya abid
Waliba samra buu na yiri


SOORTA XIKMADDA QUUTA

Amin A. Axmed

Sayidkeennu wuxuu yiri
Sida idaan idiin diray
Yay badan dhex socotee
Qoollay sideedii
Dhib ka suula abidkiin
Sinji abeeso oo kale
Caqli sugan lahaada
Salfudaydku weligii
Miro sooma saaree

Soorta xikmadda quutoo
Sahankiinnu yuu noqon
Mid aad silic ka dhaxashaan
Iyo seefta nacabkaba

Libaax sabada joogoo



Wuxuu sosho rabaa jira
Waa sad feejignaantoo
Lagu samatobaxayee
Siriqdi cadaawaha
Sahal hawgu dhicinee
Kaba siqa fudaydkana
Rabbi talada saartoo
Samir badan lahaada

Soorta xikmadda quutoo
Sahankiinnu yuu noqon
Mid aad silic ka dhaxashaan
Iyo seefta nacabkaba



SH





SHAAFICI

Aweis A. Ali

Raggu ways wada shabbihi
Sheeddaa marka laga arko
Nin kastaa shaataxlayn
Shaajac loo wada malayn
Balse Shaaficiyoo kale²
Ayaan shan laga helayn!
Marna waa Sheekh la hubo
Injilka lagu shuboo
Towreed sheeko kuugu dhigi
Shahaadduu kuba sitaa

Shaafici waa shaaciroo
Shacabku aqoonsan yahay
Sharaf loo wada hayaa
Ilayn wuu shaqaystaye
Qaaraan shay looga rabo
Shaxaad haddii loogu tago
Shantuu kuu buuxiyaa
Asoon sawir kugu shiddayn
Marnaba aan sheegahayn
Shafecadi uu ku taray

Shaafici waa aftahan
Sheekadiisu waa xariir
Suugaan aan shalow lahayn
Samaan loo shaqal tiruu
Shactara kuu marinayaa
Hadaad shawr ugu timaad
Intuu shaah kuu shubuu
Shaxshax kuu soorayaa
Misna kuu sheekeeyaa
Marna kaa sheekaynayn

² Rev. Shaafici Ibraahim Faarax, (dhashay 1932), waa Masiixi Soomaaliyeed oo magac wayn ku leh dhulka Soomaalidu degto iyo meelo ka sii fogba.



DH





NOO DHALATAY GUUL

Y. B. Xirsi

Dhiig la daadiyaa
Dambigii dhammaan
Naga wada dhaqoo
Noo dhalatay guul

Ruux nagu dhex jiraa
Qudduus naga dhigoo
Yaa na dhawrayoo
Noo dhalatay guul

Dhaawicii jidhkiyo
Nabaradi ku dhacay
Ruux buu dhiibayoo
Noo dhalatay guul

Cudur loo dhintiyoo
Wixii dhibay bulshada
Ciisaa dhaafiyoo
Noo dhalatay guul

Hadyad aan dhammaan
Lagu dhalan mar kale
Ciisaa dhiibayoo
Noo dhalatay guul

Wiilkii dhashee
Dhimashadii ka kacay
Yaa na dhawrayoo
Noo dhalatay guul

Qoys uu dhaqdiyo
Dhashiisaynu nahay
Xaqii dhaansanoo
Noo dhalatay guul

WAXAY DHAAYUHUBA ARAG

Amin A. Axmed

Hadday dhimashadu timaad
Ciiddiyo dhagax laygu rogo
Anigu dhabtii waxaan hubaa
Inuu dhaxal iga horreeyo
Iyo nolol aan dhammaanayn

Illayn dhiiggii Masiixaa
Jirkayga ku dhaashanoo
Dhankuu jiro baa aniga
Horay gogol laygu dhigay

Dunidu waa labo dharaar
Anigu dheef kama sugée
Waxay dhaayuhuba arag
Dheguhu abidkoodba maqal
Ayu Rabbi dhawr i yiri

Inay dhicisoobin abid
Dhammaan ballamaha Ilaah
Ayaa dhiirranaan i gelin
Iyo rajo aan is dhimin

EEBBAASE DHAMMAAN U NAXAY

Amin A. Axmed

Haddaan Dhexdhexaadiyuhu
Aanu dhulka hoose iman
Dhabtii nolol aan go'ayn
Cid dhaxashaba lama arkeen

Dadkuna wuu dhiman lahaa
Qiyaamana dhib iyo hoog
Ayu dhex maquuran lahaa

Eebbaase dhammaan u naxay
Badbaado u soo dhigoo
Si ay dhiiggii Madiga
Nimciyo dheef uga helaan

Masiixu haddaanu u dhiman
Dembiiliihii dhoohanaa
Qaar badan dhalanteedka iyo
Dhabbada xumi kamay tageen

Cidina dhug umay lahaateen
Inay dembi dhaafka awgii
Aabbaha ugu soo dhawaatee

Eebbaase dhammaan u naxay
Badbaado u soo dhigoo
Si ay dhiiggii Madiga
Nimciyo dheef uga helaan

U FUR DHAAYIHIYO QALBIGA

Amin A. Axmed

Haddaanu darteen u dhiman
Masiixu dhiiggiisii shubin
Dabeed dhimashada ka kicin
Badbaadada lama dhadhamiyeen
Lamaba dhaxli lahayn nolosha
Dhammaadkaba aan lahayn

Dad baase ka dhoohanoo
Injiilkaba dhuuxin weli
Allow dhegahooda iyo
U fur dhaayihiyo qalbiga

Rabbiga dhexdhexaadintiisaa
Dhalisay inay wada heshiiyaan
Oo ay isu soo dhawaadaan
Dhabtii Eebbiyo dadkiisii
Xijaabku dhex oolli jirayoo
Muddada dheer kala fogaa

Dad baase ka dhoohanoo
Injiilkaba dhuuxin weli
Allow dhegahooda iyo
U fur dhaayihiyo qalbiga

DHANKA MIDIG KUWAAD MARIN

Amin A. Axmed

Kolkuu dhaco qiyaamahu
Dadkoo dhami hortaada
Safaf dheer u soo galo
Dhanka midig kuwaad marin
Dhabtii inaan Rabbow nahay
Kolla dhayalsan maynoo
Laabtayaday ku dhigan tahay

Ifka intaan dhex joogno
Dhici mayso abidkeed
Dhammaan amarradaadii
Inaan dhawri waynoo
Cidlo kaga dhaqaaqno


Dunidani dhammaadka ah
Illayn dhimasho mooyee
Dhaxal laga sugaayoo
Lala dheelman baan jirin
Annaguse dhankaagaan
Nolol dhadhan macaaniyo
Rabbow dheef ka filannaa

Ifka intaan dhex joogno
Dhici mayso abidkeed
Dhammaan amarradaadii
Inaan dhawri waynoo
Cidlo kaga dhaqaaqno

ILLAA DHIMASHADA XAJIYA

Amin A. Axmed

Ogow haddii dhiil la lulo
Caanaha ku dhex jira markaa
Dhay inay weli sii ahaadaan
Tu aan dhici karinba weeyaan



Dhabtii waxaan uga socdaa
Dhabbihii xaqa ruux la tusay
Hadduu dhayalsaduu ka tago
Dhinaca shaydaanka maro
Kollay gaalnimuu dhaxlaa

Wacdigaa waxaa dhuuxi kara
Qofkaan dhegahaba ka xiran
Dhambaal baan idiin sidaaye
Iimaankaad ku dhaadataan
Illaa dhimashada xajiya

Xareedda dhulkaa ku waran
Doofaarkuba intuu dhex galo
Ayuu dhoobadiyo carrada
Dhabtii ku gagan mar kale

Tusaale midkaa u dhigan
Waa kuwa sida dhedo arooryo
Iyagoon wakhti dheerba sii jirin
Dhibtii laga soo furtiyo
Mar kale dhamacdi ku noqon

Wacdigaa waxaa dhuuxi kara
Qofkaan dhegahaba ka xiran
Dhambaal baan idiin sidaaye
Iimaankaad ku dhaadataan
Illaa dhimashada xajiya



C



CIISAW MASIIX

Y. B. Xirsi

Ciisaw Masiix
Yaa na caawiyoo
Na casuumayoo
Nimco noo camiran
Ku cawaysinnaa

Wuu na cafiyoo
Ciqaabtii dambigaa
Kama cabsannee
Waanu ciidaynaa

Cir darooray baa
Cosob iyo ugbaad
Cagaar soo baxshoon
Ku cawaysinnaa

Dadkoo ciilan oo
Cuduradu dilaan
Dhakhtar caawiyiyo
Caafimaad la helin

Mucjisadii caddayd
Caynkastaba xanuun
Ku caraabiyoo
Caafimaad la sii


Cir darooray baa
Cosob iyo ugbaad
Cagaar soo baxshoon
Ku cawaysinnaa

CIIDANKII MASIIX

Y. B. Xirsi

Ciidankii Masiix
U cumaamadee
Caalam loo diroow
Cabsi li'i u baxa

Cadaw baa jiroo
Sida libaax ciyee



Dad uu cuno rabee
Cabsi li'i u baxa

Dadka ciilane
Carabtu ay qaldeen
Aynu caawinee
Cabsi li'i u baxa

Cadceed soo baxdiyo
Nuurkan Ciise shiday
Lama celin karee
Cabsi li'i u baxa

Mucjisadii caddayd
Ruuxu nagu camiray
Yaydin caawinee
Cabsi li'i u baxa

Kimis aad cuntiyo
Cabitaan dhammaan
Ciisaa wada hayee
Cabsi li'i u baxa

Cusbadii dadkiyo
Nuur cadoo la shiday
Yaad la cayntahee
Cabsi li'i u baxa

HADDAAD CABSII WAYN DAREENTO

Amin A. Axmed

Haddaad cabsi wayn dareento
Naftaadu calool xumaato
Ha moodin inaad cidlowday
Ciisaa kula jiree ogsoonow
Isagaa caawimaad ku siinoo
Culays walba kaa dulqaadiye

Mar kasta cindigaaga geli
Inuu Curadkaa la doortay
Adiga ku caleemo saaroo
Carruurta Ilaah midkood tahay

Hadduu cudur daran ku helo
Ee uu cududaha jirkana
Dhammaan kaa wada curyaansho
Adigoo aan cabasho muujin
Rabbaa caafimaadka bixiyee
U caymad xaggiisa weligaa

Mar kasta cindigaaga geli
Inuu Curadkaa la doortay
Adiga ku caleemo saaroo
Carruurta Ilaah midkood tahay

MARNABA HA KA BAQAN CADAAWAHA

Amin A. Axmed

Hadduu cirku kula wareego
Ciriirina aad dareento
Ha cabsaninee xusuuso
Inuu kula joogo Ciisoo
Culayskaba kaa dulqaadi

Marnaba ha ka baqan cadaawaha
Goor walba kuu cagajugleeya
Cayn kastuu weligii ahaadaba
Kumaba ciribtiri karaayee
Caaddilka aaminoo kalsoonow

Haddaad cidlo ba'an la kulanto
Cid walba iska kaa fogayso
Xigtadoo idil kuu carooto
Inaad ceeboobin garo
Cisiyo sharaf waynba leedahay

Ahaw mid calool adayg leh
Cindiga weligii ku haayo
Cilmiguu Rabbigeen na baray
Sidaad camallada iblays
Dhammaan u curyaamin layd



DAD BAA MOODA CIISE

Amin A. Axmed

Kuwo loo cabbiray shalay
Inuu Curadka Eebbe
Ka dulqaaday ceebtiyo
Dembigay la ciireen
Oo aan weli calooshiyo
Cindigaba ka aaminin
Ceeryaamo baasiyo
Fudayd cayrshay baa jira

Haddaan caddeeyo sheekada
Waxa ay la cayn yihiin
Kuwii codka iblaysku
Cajab geliyay oo kale

Dad baa mooda Ciise
Inuu yahay qof caadiya
Cilmi li'i daraaddeed
Awooddiisa caasiya
Waxay camal wadaagaan
Caqli laaweyaashii
Caaddilkuba inuu jiro
Cisho qurah rumaynin

Haddaan caddeeyo sheekada
Waxa ay la cayn yihiin
Kuwii codka iblaysku
Cajab geliyay oo kale

WUUNA CAMAL QABAW YAHAY

Amin A. Axmed

Cisho horiyo maantaba
Ciise Masiixna weligii
Isku caynad weeyoo
Wuuna camal qabaw yahay

Curad weeye hufanoo
Cillad lagu tilmaamiyo
Ceeb laguba sheegine

Qof kastoo ciriiriyo
Culaab wayn dareemayo
Waakan u ah mid ciiltira
Haddana siin cisiyo sharaf

Cadceed duhurki jooqtiyo
Sida dayax cawaysnimo
Caalamkaba dhammaantii
Cirif kasta ka muuqday

Ayuu Ciise dunidana
Kolkuu caasha keenay
Ku caawiyay iftiin wayn

Qof kastoo ciriiriyo
Culaab wayn dareemayo
Waakan u ah mid ciiltira
Haddana siin cisiyo sharaf

XER AAN CABSAN BAYNU NAHAY

Amin A. Axmed

Cilmigii horee layna baray
Ayaynu ku camal falnaa
Inaan xertii Ciise nahay
Ayaan caawana qiraynaa

Haddii layna caayo awgii
Aadmigoo idil noo caroodo
Farxad noo curata mooyee
Marnaba cillad uma arkayno

Dhalil iyo ceeb waxaa leh
Ciddaan Rabbigaba aqoonin
Cawaannimo aawadeedna
Shaydaan weli caabudaysa

Annaga cutubyada Injiilkaa
Goor walba inna caawinaayoo
Illayn Curadkaan rumaynaa
Xaqaba noo sii caddeeyay

Hadduu cadaawuhu na bado
Ciiliyo silic aan yarayn
Ciqaabtiisa kama baqaynoo
Xer aan cabsan baynu nahay

Dhaliiliyo ceeb waxaa leh
Ciddaan Rabbiga aqoonin
Cawaannimo aawadeedna
Shaydaan weli caabudaysa

CISHADII AAN AQBALAY ISAGA

Amin A. Axmed

Cishadii aan aqbalay isaga
Nolol cusub baan dhex galay
Cadaabtana xor baan ka ahay
Illayn dembigaan la ciiriyo
Culayskii buu iga dul qaaday

Intaan Ciise weheshanaayo
Akhrisan cutubyada Qorniinka
Anigu cabsi wayga dheer tahay

Anoon weli gelin cindiga
Jacayl inuu Caaddil ii qabo
Ayuu cirka sare ka yimid
Badbaadshe i caawiyoo
Cilmiga runta ahna i batay

Dabeed waddadii caddayd
Intaan cagta saaray baan
Ka tegay camalladii xumaa



G





INTAY GOORI GOOR TAHAY

Amin A. Axmed

Garo oo adduunyadu
Gogol lagu negaadiyo
Guri waara ma laho
Waa gole rasmi ahayn
Oo geeddi laga yahay

Kaagan gudcurka fadhiyee
Xaqa garab maraayow
Intaad geeriyoonin
Galabtaba is daba qabo

Intay goori goor tahay
Aqbal Gabanka Eebbee
Kuu gayn doona Aabbaha

Godka iyo xabaasha
Galabtaad u hoyato
Dabeed goor waxaa iman
Gadaal laysu soo celin
La hor tegi Garsooraha

Guullaheen agtiisana
Cidna cidni gargaarayn
Qof walbaba wuxuu galay
Abaalkeeda loo gudi

Intay goori goor tahay
Aqbal Gabanka Eebbee
Kuu gayn doona Aabbaha

DABA GALA BADBAADSHAHA

Amin A. Axmed

Galladduu Ilaahay
Dadka gebi ahaantii
Goor hore u fidiyay
Haddaad garanba waydaan
Sow maaha guuldarro
Iyo gubasho joogta ah

Heedhe gacalayaalow
Waa gabaabsi dunidani
Kala guurkii weeyee
Rabbi haydin gargaaree
Isu dhiiba galabtaba

Isagoo dembiba gelin
Gefafkiinnii awgood
Inta geedka lagu xiray
Masiixii idiin go'ay
Haddaad garwaaqsan waydaan
Waa idiin garaad xumi

Xilligu wuu is gurayaa
Iblays gaaf wareegiyo
Maalmo gurraacan baa jira
Si aad guul u hanataan
Daba gala badbaadshaha

II GALAY ABAAL WAYN

Amin A. Axmed

Gefafkaygii adigaa
Runtii guudka saartoo
Ii galay abaal wayn
Marna aanan gudi karin

Gaalnimo i lumisiyo
Iga bixiyay gudcurkoo
Rabbow ii gargaaraye

Anigana hadiyo goor

Waxaad iga guddoontaa
Gabayada ammaanta ah
Iyo mahadnaq gaar ah

Garaad li'ida awgeed
Anoon xaqaba garanayn
Adaa gallad aan mudan iyo
Ila goobay samahee
Inaan guusha noloshiyo
Galo hoygii nabaddana
Adaa igu gardaadshay

Aniguna hadiyo goor
Waxaad iga guddoontaa
Gabayada ammaanta ah
Iyo mahadnaq gaar ah

GAR BAY IGU TAHAY ANIGA

Amin A. Axmed

Anoo xaqii gees ka maray
Iblays i go'doomin jiray
Adaa Rabbow ii gargaaray
Dhammaan dembigii aan galay
Iyo gefafkaygii hore
Geddigood iga saamaxoo
Weliba nolol aan go'ayn
Haddana gunno iiga dhigay

Gar bay igu tahay aniga
Inaan gooriyo ayaan
Guullow mahad kaaga noqo
Haddiyaad guddoon i tiri

Anoo gaalnimo ku sugan
Garasho li'i aawadeed
Shaydaan iska daba gucleeyo
Adaa Rabbiyow godkiyo
Gudcurkii iga soo baxshoo
Laabtaydii gama'sanayd
Hurdadii kaba guuriyoo
Iftiin ku gardaadiyee

Gar bay igu tahay aniga
Inaan gooriyo ayaan
Guullow mahad kaaga noqo
Haddiyadaad guddoon i tiri

GAASHAAN DIFAAC U AH

Amin A. Axmed

Gaaladiyo iblayskuba
God kastooy qodaanba
Ka guulaysan maayaan
Kuwa Gabankii Eebbe
Gelin kasta ku xiranoo
Gacmahana u hoorsada

Illayn geed har wayn bay
Fadhiyaan guntiisoo
Xaqii ay garteen bay
Ka dhigtaan gabbaadiyo
Gaashaan difaac u ah

Shaydaan gucleeyiyo
Inta daba gurguurtaba
Kama gacan sarreeyaan
Kuwa ay ka go'an tahay
Gooriyo ayaanba
Inay Guulle raacaan

Illayn galladdi Eebbaa
Ku gadaaman idilkood
Injiilkana goshoodiyo
Garbahay ku qaataan
Dhibaataba ma gelayaan

GUUSHIYO BADBAADADA

Amin A. Axmed

Anigoo gu'yaal badan
Gebi dheer ka sii lulan
Rabbaa ii gargaaroo
Gurigii madoobaa

Iga saaray goor hore
Galladdiisi weeyaan
Guushiyo badbaadada
Aan galabta haystee
Gob baan ahay xorooboo
Ka soo go'ay iblayskii

Anigoo gefkaygiyo
Gosha xumo ku haystoo
Dembigii aan geystiyo
Xad gudubkaba dareemayn
Gudcur weli dhex taagan
Ayu Gabankii Eebbahay
Gacan wayn i siiyoo
Dabeed xaqii aan gees maray
Inta aan garwaaqsaday
Eebbe magantii aan galay

GACMAHA INTAAN SARE U QAADO

Amin A. Axmed

Hadduu Rabbi ii gargaaray
Gefkiyo dembigaygii hore
Gebigood intuu iga cafiyay
Noloshaan weligeedba go'in
Dabeed iga guddoon i yiri

Waxaa anna ila gudboonayn
Inaan galladdaa illaawoon
Nimcadaa garan waayo maantee

Gacmaha intaan sare u qaado
Waa inaan goor iyo ayaanba
Guullahay mahad wayn u celiyaa

Haddii garab la iiga dhigay
Ruuxaa i gardaadinaayoo
Gaashaan iyo weliba ii ah
Haddana wax kastoo gurraan
Mar walba i yiraa ka gaabso

Anigu inaan gees ka maro
Calool xumo daran aan geliyo

Gar iyo libin uma arkaayee

Gacmaha intaan sare u qaado
Waa inaan goor iyo ayaanba
Guullahay mahad wayn u celiyaa

IBLAYS GUDAYAASE JIRA

Amin A. Axmed

Haddaad gooriyo ayaan
Gefkaaga aqoonsan tahay
U qabto Guullena jacayl
Waa inaad garataa adigu
Inaad guutadii la doortee
Noqoday gabannadii Ilaah
Galabtaba tahay midkood

Iblays gudayaase jira
Oo aan kula rabinba guul
Haddaanad ka sii galbanin
Oo aad Rabbi garab ka dhigan
Ogow inuu dabin ku gelin

Haddaad gabbaldhac iyo waa
Abaalkuu Masiixu kuu galay
Galladdiina mahad ka celiso
Waxaad gurataa mirihii
Geedkii noloshee ogow
Qiyaamana guri la hubo
Nimcadu taallaad ku gam'i

Badbaadadii kuu godlatay
Haddaad gaagaxa ka jirin
Halis baad go'e u tahay
Inuu shaydaan gadooday
Durbaan kale kuu garaaco

ILA GOCO GROVES

Aweis A. Ali


Merlin Guulihibaa
Ka badnaadshay geeri
Isaga gurboodoo
Gugu laba u buuxsamin
Beerkaa xanuun galay
Saddex sano asoon gelin
Waxaa jiray gaari
Awowgii Grove waday
Markuu galay iskuulkana
Kelyihii xanuun gaar

Gabagabee dugsigi sare
Shil kale ayuu galay
Walax uu garaacay
Uusan garan waxay tahay
Gugac qaraxa daysoo
Gacantiisi bidix baa
Saddex farood ayaa go'ay
Dhakhtar baa la geeyoo
Inkastuu dhib badan galay
Guullaa badbaadshay

Merlin garasho dheerihii
Guule yuu jeclaayoo
Soomaali gebigeed
Guudkuuba saartoo
Gibilkiisi sidaan nahay
Gaalib noogu yimidoo
Guri iyo gesiinba
Cilmi gaan ahoo sugan
Waxay gacani goyso
Gobanimo innoo soor

Dorothy-dii gobta ahay
Ee gargaarka caafimaad
Geyigeena keentay
Guulle nala wadaagtay
Gaari bay ahaydoo
Ilmaheena gaanka ah
Gaarrax bay u diiddoo
Way wada gargaartay
Gaasabbaxeenoo
Gaarsiisay horumar

Gudcur kuwa ku daaloo
Aan Masiixa garanayn




Bugto kuwa gabraartoo
Waa gibil madoobaad
Iyagaa gargaaroo
Ganbo aan ka qaadan
Gaarsiiyay Injiilka
Dawo gaara siiyoo
Guudka iyo ruuxaba
Guushaas bal eega!

Doqon gaatamaayo
Garashadiiba laga xaday
Gaalleef af badanbuu
Guntigiisa soo geli
Soo gabeeyay shaydaan
Xerti Guullaheennuu
Inuu ruuxa gooyaa
Garaadkiisi geliyay
Inuu gallad Eebbe
Uu ku gaari karaba

Merlin geeriyoodoo
Waxaa gaaray Dorothy
Golxob dhaawaceedii
Dhibka gaaray reerkaas
Eebbe uun ayaa garan
Rabbow gabanadoodii
Faracooda gebigood
Gacalkaagi weeyoo
Gargaarkaagaa siiyoo
Garabkooda noqo uun

Cafis gobanimo ayay
Gaarsiiyay Dorothy
Gabgablihi la sirayee
Dhiigooda galay gebi
Gacaliyaheedi dilayee
Carmalnimada geliyee
Agoomeeyay gabanadi
Geesinimo dhaba oo
Guulle uga timidoo
Heerkaa ku gaadhay

Ila goco Groves
Dal nabaddu gaan tahay
Geed geed u garanoo
Gacalkoodu tuban yahay



Ka guureen dhammaantiis
Gacan qabashadayneey
U galeen Banaadir
Mahaddaay u guureen
Tacliin ay u geeyeen
Guulow abaal mari

Omar Eby-na geeddigi
Ay galeen Groves
Gaarsiintii Injiilkiyo
Dugsiyadii gabanadu
Tacliintay guranayeen
Goobo caafimaad iyo
Wanaaggay gingimayeen
Ku guuriyay buuggii
Uu ka qoray Groves
Gallad baan u haynaa



F





INJIILKAAN FAAFINNAA

Aweis A. Ali

Injiilka lagu farxee
Faa'iidada miirana
Fariidka qaata ee
Nin faanaa foolxumaa
Iblayskaa faranaxaa
Markii aad kala furtee
Injiilka farriinta sida
Faallada uu kuu hayaa
Fisqiga kaa reebiye
In aad fahamtaan filaa

Hadday fiid kuu tahiyo
Fajarka markii la galo
Intaad falanqayso hooy
Injiilku waa falxade
Iblays uu ka fiigayoo
Cid kastoo farabaxdaa
Shaydaanku foofsado
Injiilkaa kaba furoo
Isagaan faafinaa
Kuso furanaa dadkaa

Fursad weeye runtii
Injiilkaan fiicane
Weliba ay fidinayaan
Walaalaha foojigane
Farxad kuugu sheegaya
Kitaabkii Falimahee
Feredkiisu uu cad yahay
Dhibaato ku feenatiyo
Fedfed kaa ilaaliyoo
Faral tahay raacidiis



Q



DHAMMAAN QOYS BAAD TIHIIN

Y. B. Xirsi

Shan weeyaan qaaraduhu
Bulshada qaybqaybsaneey
Dhammaan qoys baad tihiin

Shaydaanku qasbuu wadaa
Dhib iyo qalaase dhaca
Qaxootuu kula rabaa

Intaad sharka wada qubtaan
Wanaagana qaadataan
Rabbiga u qushuuca dee

Dadkoo qoorta laga jariyo
Miiniyo qarax loo dhigaa
Qorshuhu waa kii Iblays

Jacayl la isku qaabiliyo
Qaadirku nabad buu rabaa
Nolosha qiimo aadku heli

Intaad sharka wada qubtaan
Wanaagana qaadataan
Rabbiga u qushuuca idil

QORSHAHA RABBIGEENU DHIGAY

Y. B. Xirsi

Dadkoo qoorta laga jariyo
Inaad qarxisaan bulshada
Kuwa qiima moodayow
Runtii qiil looma helo

Qaaddirka dunideenan dhigay
Xisaab qalinbaa u yaal
Intaan xukun lagugu qaban
Qabsada towbad baa furane

Bulshada qawlkii Masiix
Intay qabsadeen xafiday
Qalbiga ruuxa loo dhex dhigay
Farxaday qiironayaan

Kuwa la qasaariyee
Wadada qaldan loo horkacay
Intaad Masiixa qirtaan
Gacantiisana qabsada

Qorshaha Rabbigeenu dhigay
Injiilkaan qaadaynaa
Kuwa qataneenba maqal
Ayaan qaybtooda siin

Bulshada qawlkii Masiix
Intay qabsadeen xafiday
Qalbiga ruuxa loo dhex dhigay
Farxaday qiironayaan


XAQU QAALI WEEYEE

Amin A. Axmed

Kuwa nuurka quursadee
Khaladkana gelaayow
Qirashada Masiixa
Khayrkaba xambaarsane
Haddana ay qudhiinniyo
Ku qaboobi laabtuye

Intuu dhicin qiyaamuhu
Iga qaata waanadoo
Xaqu qaali weeyee
U soo quma xaggiisa

Kuwa quruxda dunidani
U qiimeeya sida wayn
Aad ugu qancaayow
Xagga Qaaddirkeen bay



Qaninimadu taallaa
U ogaada qaabkaa

Intuu dhicin qiyaamuhu
Iga qaata waanadoo
Xaqu qaali weeyee
U soo quma xaggiisa

KHAYRKA DHALASHADIISAA

Amin A. Axmed

Jacayl baan la qiiron
La qiyaasi karinoo
Waana maalin qiimo leh
Naga mudan qaddariniyo
Inaan sare u qaadnee

Qumanow Masiixa
Khayrka dhalashadiisaa
Loo khushuucayaaye

Farxaddaa qalbiga iyo
Laabta ii dhex qotontaan
Walaalaha la qaybso
U qumaa hadiyo jeer

In la qiro waxaa mudan
Qoraal Eebbe inay tahay
Waana maalin qaali ah
Qof kastoo Masiixi ah
Qaayo wayn dareemayo

Naftuna ay ku qanacdo
Qurux iyo u tahay guul
Weliba quut u gaar ah

Farxaddaa qalbiga iyo
Laabta ii dhex qotontaan
Walaalaha la qaybso
U qumaa hadiyo jeer



K



MASIIX IDIN KAAFIN KARA

Aweis A. Ali

Soomaalaay u kaalaya
Masiix idin kaafin kara
Dhammaan kaalmaynaya
Kadab badan laga heloo
Kadeed kaa ilaaliyoo
Kafaaladna siinaya
Ku dhintaya kiiba nool
Kalgacal isagoo qaba
Kal iyo lab ayuu adiga
Eebbe kugu xirahayaa

Soomaalaay ka kaalaya
Ibliis keligii taliya
Eebbe idin kala gaynayoo
Karkaar inta uu shido
Isagoon kaa naxayn
Inuu kugu guro raba
Karah kuu qaba adiga
Karaamana kula naca
Maxaad ka ag qaban Ibliis
Ilaahbaa kaaga roon?

Soomaalaay u kaalaya
Masiix idin jecel kun jeer
Kalsooni ku qaba isaga
Maxaa kaloo idnka maqan?
Samada sare ayuu ka yimid
Dhulkan aan ku noollahuu
Ku bixiyay qiimihii
Waxaa loo karbaashayoo
Karooskii loogu xiray
Kalgacal uu idiin qabee



L



SOOMALIDA LOO SHIREE

Aweis A. Ali

Soomaalida loo shiree
Lalab inta loo qasay
Lakabkaa lagu ridee
Weliba diin looga dhigay
Shar aan la malaysan karin
Markii ciil lagu habsaday
Qosol loo raacshayee
Weliba lagu sii digtee
Ka soo laabanna aqoon
Lugooyada lagu siray

Soomaalida loo shiree
Kuwaan laab qoyan lahayn
Inta seef loola yimid
Islaamka lagu qasbee
Midkii iska leexiyana
Luquntaa laga jaraa
Islaamkaa lama rabee
Laabraac maba jiree
Naftooday la baqahayaan
Haddii run la doonayaa

Soomaalida loo shiree
Xaqa lama oodi karo
Laayaca idinku dhacay
Labanayda aad nacdeen
Lalabada idinku riday
Masiix laalaaba yimid
Injiilkiisu waa ladnaan
Marna aan la hurikarayn
Laayacaad looga baxo
Laqwi aan lagu arkayn



M





SILICAY KU MARIYEEN

Amin A. Axmed

Waxaan maanka ku hayaa
Marna aan illaawayn
Maalintaad daraadday
Adigoo aan mawdkiiyo
Dhimashaba mutaysan
Oggolaatay muragada
Dembi igu malaasnaa
Adigayga mayroo
Xikmad iga maqnaydiyo
Aqoon igu mannaystay

Masixaan jeclaayow
Kii ii micinow
Mahad iyo ammaan baan
Maamuus kaaga dhigayaa

Kolkay meel bannaan ah
Tiir kuugu mudeenoo
Dabeed kugu musmaareen
Silicay ku mariyeen
Maalin qurah xusuustiyo
Maskaxdayda kama go'in
Anigoo mugdiga baas
Dhex maquranaaya
Magantaada adigaa
Mawlow i geliyee

Masixaan jeclaayow
Kii ii micinow
Mahad iyo ammaan baan
Maamuus kaaga dhigayaa



MASIIXA NA DOORTAYOOW

Y. B. Xirsi

Masiixa na doortayow
Xumaha naga maydhayow
Xaqnimo nagu maamulow
Xamdiyo mahadaada hoo

Markii aan barinaba
Masiixa maqlahayow
Aadaa noo miciinayee
Muraadada noo habee

Masiixa la maagayow
Musbaarada lagu mudoow
Xasuus aan maydhmahayn
Wadniyo maankay ku taal

Adduunkoo wada madaw
Balaayadu miisan tahay
Masiixooow nuurkan shidan
Aday mahadaada tahay

Kuwii midiyaha ku muday
Masiix u duceeyayow
Macalin baad noo tahoo
Jidkaagaan wada marnaa

Masiixa la maagayow
Musbaarada lagu mudoow
Xasuus aan maydhmahayn
Wadniyo maankay ku taal

HADDAY JAWAABTU MAYA TAHAY

Amin A. Axmed

Midnimaduba waa shay
Sinnaba looga maarmayn
Waana amar Masixu
Mar hore na siiyee

Maxaa haatan diiday
Mabda' inaan ka dhiganno
Maalin iyo habeenba
Ku maarayno noloshaba?

Mise waa iblayska
Kan na maamulaayee
Mugdiga nagu hagaaya?

Hadday jawaabtu maya tahay
Qalbiyadan madoobi
Aan ka mayrno daxashoo
Midba midka kaleeto
Ha u dhiibo midigtee
Ayno wada midawno

Marka ay walaaluhu
Isku maan yihiin bay
Magac leeyihiinoo
Maamuus ku waaraan

Mushkiladdu xaggee bay
Nooga timidday maalmahan
Oo marinkii toosnaa
Na baal mariyay waayadan?

Ma shaydaan hagoogtaan
Magantiisii galnayoo
Midiidinno u noqonnay

Hadday jawaabtu maya tahay
Murankiyo khilaafkaba
Aan muskoodi awdnee
Kuwo isu micinoo
Mawlana ku xiranoo
Kala maarmin noqonno

GEBAGEBAA LA MARAYAA

Amin A. Axmed

Haddaynaan midnimada
Mar kastaba adkaynayn
Macnaheedu wuxuu yahay
Amarradii Masiixa
Inaan baal maraynoo
Muhimadday lahaayeen
Maankaba ku haynin

Mid kastaba naftiisa
Ha u sheego maantaba
In la joogo maalmuhuu
Madigii ilaahay
Soo muuqan lahaaba

Muxubbiyo haddaynaan
Jacaylkaba mudnaan siin
Midba midka kaleeto
Niyadsami u muujin
Ma ahaan karayno
Kuwo marag u furi karo
Masiixiyo Injilkaba

Muddadii uu Badbaadshahu
Mar hore noo ishaariyo
Gebagebaa la marayaa
Maskaxdiinna geliya
Inuu wakhtigu sii maran

MASIIXINIMAAN KU DHIMAN

Amin A. Axmed

Mu'min xididaystayoo
Mugdigii ka baxaan aho
Marnaba ka baqayn warmaha
Cadawgu uu la maaggan yahay
Weliba maalka dunida yaal
Macnaba aanu ugu fadhiyin

Illayn nuurkii mar hore
Masiixu igu hoggaanshaan
Anigu dhex mushaaxayaa

Munaafaq warkiisa iyo
Murankay gaaladu hayaan
Murugba ima gelinayaan
Masiixinimaan ku dhiman

Injiilka macaanta badan
Macnaha waynee ku jira
Ayaa maankiyo qalbiga
Maskaxdaydaba daweeyee
Mar dambe inuu iblays i dago
Waa midaan abidkeed dhacayn

Illayn Mawlaha i haga
Oo aan magantiisa galay
Ayaa ii maciina weligii

Munaafaq warkiisa iyo
Murankay gaaladu hayaan
Murugba ima gelinayaan
Masiixinimaan ku dhiman

KALA MUDAN DHARAARUHU

Amin A. Axmed

Kala mudan dharaaruhu
Waxaa maalin wayn ah
Kolkuu dhashay Masiixu
Mugdiguna idlaadoo
Meel kastaba adduunyada
Gaaray magaca kiisa ah

Doqon baase weli moog
Inay maanta oo kale
Milgo gaar ahaaneed
Iyo hanatay maamuus

Maryan kay ku curatay
Ahaa Madigii Eebbe
Markuu dunida soo galay

Mahiigaan sidiisay
Nimco loo mashxaraday
U maanshaysay uunkii

Doqon baase weli moog
Inay maanta oo kale
Milgo gaar ahaaneed
Iyo hanatay maamuus

ANIGU KAAMA MAARMI KARO

Amin A. Axmed

Masiixii i doortayow
Anigu kaama maarmi karo
Maankiyo qalbigaad ku taal
Ruuxaan kula simo ma jiro
Aadaa mugdigaan ku jiray
Mar qurah iga soo baxshoo
Nimcaanan mudnayn haddana
Dheefiyo maal igaga dhigay
Iyo manfac aan idlaanayn

Mulkiga adigaa laho
Magantaadana ahee
Mar kasta iyo meel walbaba
Adigu igu maamul abid

Adigu Madigii waxaad tahay
Oo uu mawlaheen u soo diray
Si uu mid kastaba u helo
Badbaadiyo nolol macaan
Markhaatina waxaan ka ahay
Maalintii aad dunida timid
Kuwii murugada ku jiray
Kolkaad dembiyada ka mayrtay
Inay mahadiyeen dhammaan

Mulkiga adiga laho
Magantaadana ahee
Mar kasta iyo meel walba
Adigu igu maamul abid

DHALASHADI MASIIXEE

Aweis A. Ali

Dhalashadii Masiixee
Mowle nooga yimidee
Noo miciinay innagee
Yaan maanta joognaa
Yaan maanta joognaa

Maarkoos siduu qoray
Mataayoos u marag furay
Mowle nala joogoo
Maryan hooyadii tahay
Madi Eebbe weeyaan

Dhalashadii Masiixee
Mowle nooga yimidee
Noo miciinay innagee
Yaan maanta joognaa
Yaan maanta joognaa

Dunidoo mugdi aho
Murrugmaarug miirana
Na maansheeyay debiyoo
Murug ayna saaqday
Masiixaa innoo yimid

Dhalashadii Masiixee
Mowle nooga yimidee
Noo miciinay innagee
Yaan maanta joognaa
Yaan maanta joognaa

Naga maydh dembigiyoo
Mowle nala heshiisii
Miisaanka aakhiro
Kuwa xukuna marayaa
Ma aan nihin innaguye

Dhalashadii Masiixee
Mowle nooga yimidee
Noo miciinay innagee
Yaan maanta joognaa
Yaan maanta joognaa

MARKUU DHICI QIYAAMUHU

Amin A. Axmed

Meel kastaba ayaamahan
Murugiyo waxaa jira
Masiibooyin dhacayoo
Cidna moosi karinoo
Ku meeraysta dunidani

Doqon baase weli moog
Mawjadaha halaagga
Waxa kiciya maalmahan

Masiix baase aadmiga
U macneeyay goor hore
Markuu dhici qiyaamuhu
Belaayooyin soo mara
Inay muuqan doonaan

Heer waxaa la marayaa
Waalid lala murmaayoo
La maamuusin inuu jiro
Iyo labo mataano ah
Mindiyo isu afaysan

Qaar baase mooday
Inay tahay mid caadi ah
Oo maganba loo yahay

Masiix baase aadmiga
U macneeyay goor hore
Markuu dhici qiyaamuhu
Belaayooyin soo mara
Inay muuqan doonaan

MUUQDAY ISAGA OO NOOL

Amin A. Axmed

Jimce maalin ay tahay
Xabaashuu Masiixuba
U martiyay habeenkii
Saddex maalin aasnaa

Axad buuse mawdkii
Mar qurah ka badiyoo
Muuqday isaga oo nool

Ruux kastoo Masiixi ah
Maalintan daraddeed
Waa inuu mashaxaradaa
Damaashaadna muujiyo

Maryan reer Magdala iyo
Maryan kale ay booqdeen
Karfantiisii mooyee
Maanay aragba Ciise
Mala'ig baase goortaa
U macnaysay iyagii
Inuu joogin meeshaba

Ruux kastoo Masiixi ah
Maalintan daraaddeed
Waa inuu mashaxaradaa
Damaashaadna muujiyo

MASIIXII I DOORTAYOW

Amin A. Axmed

Masiixii i doortayow
Adaa maalin iyo habeen
Naftayda u muuqda oo
Maankiyo sadrigiyo qalbiga
Jacaylkaagaa ku milan

Adiga mooyee ma jiro
Mid aan kula simo dunida
Miciin ii noqon karoo
Mawlana ii gayn karee

Dartay silicaad martiyo
Dhiiggaad igu mayrtay baa
Maskaxdaydaba ku qoran
Adoo iga mudan ammaan
Ayaan kaaga mahad ceshaa

Adiga mooyee ma jiro
Mid aan kula simo dunida
Miciin ii noqon karoo
Mawlana ii gayn karee

MODRICKERS MA MAQSHEEN?

Aweis A. Ali


Magac laga miskiin maahan
Soomaalidu ku maahmaah
Magaca Warren ah
Micnihiisa yaa ah
Mid waardiye ciidana
Gama' marna an yeelin
Siduu mayracaayo

Marwo Dorothy iyaduna
Micnaheeda yaa ah
Mowle hadiyaddiisii
Ma daaley ahaydoo
Maskax Eebbe siiyo
Muran laga ilaalshoo
Uu Masiixo dhowrsaday

Idaacaddii Masiixee
Muxubo ay u fuliyeen
Anigoo Muslim ahoo
Iska jooga Muqdisho
Kaga bayray mugdigoo
Masiixaanba raacay
Mahadbaan u haayaa

Soomaalidoo murgootoo
Meelo badan ku firirsan
Murugmaarug daaloo
Aan Masiixa garanayn
Waxaa yimid Modrickers
Uu Mowle soo diray
Muxubana ku miisay

Meel kastoo Soomaalidu
Minan ay ku leedahay
Cadan iyo Muqdisho



Nairobidi mudnayd iyo
Addis magaci weynayd
Jabuutidi mugga yarayd
Way markhaati furayeen

Waxa qoys Maraykana
Soomaalida Muslimka ah


In ay magaca Ciise
Maalin iyo habeenba
Markastaba ku wacdiyaan
Ma ahayn wax uun fudud
Masiixaase soo diray

Eebbe Warren muuq tusi
Micnihiisu uu yahay
Markaad aaddo Soomaaliya
Meel kale ma ahanoo
Minankaagi weeyaan
Magaalaa ku taalla
Magaceedu Warren yahay

Warren maabki soo qabay
Meelo badan ka baadhbaadh
Mise tuulo magaceed
Uu Warren yahaybaa
Mowle sii diyaariyay
Markii ay yimaadeen
Martiqaadba loo fidi

Martisoorki dabadeed
Injiilka Masiixyeey
Muxubbo ugu sheegeen
Intii maqashay yaabtay
Misbaaxdii Ilaahbaa
Musaafurku u keeneen
Aadna ugu micneeyeen

Labaatan sano markii ay
Meelo ka baxsan Soomaaliya
Ay injiilka Masiixa
Soomaalida u meersheen
Muqdishey yimaadeen
Miishan ay ka fuliyeen
Masiixayna tuugeen



Modrickers markii ay
Muddo waddanka joogeen
Afkanaga macaanbay
Misna ay barteenoo
Oo Kitaabki Mowleey
Murtidiisii turjumeen
Eebbaa ku mahadsan
Miro aad u badan buu
Mowle siiyay qosykaan

Muslimiinta qaar baa
Marar badan maagoo
Eabbahood miciinsaday
Isaguna megen geli
Markastoo la maagay

Helen Miller buuggii
Meeshii Ugu Adkayd
Ay ugu magac dartay
Ayay Modrickers
Sheekadoodi meerisay
Mana ay dhammaynine
Yaa mid kale innoo qori?



N



NASRI EEBBE WEEYAAN

Amin A. Axmed

Naxligii berigii hore
Nuxur inuu lahayn baan
Gartay xalay niskii dhexe

Wax kastoo uu nacabkuna
Niyaddaydii geliyay
Rabbaa iga nasakhayoo
Ii nuurshay laabtii

Naxariista Eebbaheen
Uu na siiyay awgeed
Nololiyo waxaan helay
Nimco aan dhammaanayn

Nasri Eebbe weeyaan
Shartaba haddaan nacay
Jidkii nabadda aan helay

Naaskii Injiilkana
Inaan nuugo oon jiqo
Oo aan weliba naadshaan
Nasiib wacan u yeeshaye

Naxariista Eebbaheen
Uu na siiyay awgeed
Nololiyo waxaan helay
Nimco aan dhammaanayn



W





WAYNOW MASIIX

Y. B. Xirsi

Waynow Masix
Waxyeelada dambiga
Walbahaarki jiray
Naga weeciyow
Waad mahadsan tahay

Waagii baryiyo
Wakhti dhexe habeen
Wehelkaygiyow
Waad mahadsan tahay

Nolol waarta oo
Aan la wiiqi karin
Wayne noo hayow
Waad mahadsan tahay

Wiil noo dhashoo
Wabiyada nimcada
Na waraabiyow
Waad mahadsan tahay

Waayeel iyo caruur
Bulsho wayn dhammaan
Kii wanaajiyow
Waad mahadsan tahay

Wadadii xaqnimo
Ruuxa nagu wadee
Na hoggaamiyow
Waad mahadsan tahay

WADAADDO XUN BAASE KACAY

Amin A. Axmed

Wakhtigan lagu jiro dunida
Walaalo kala tegaan arkaa
Intay midnimadiiba wiiqeen
Lumiyay wadajirkay lahaayeen

Waynow inaad soo hadayso
Waxba kama aha agtaadee
Iblayskan wareerinaayo
Ka qabo warmahiisa baas

Wuxuu wacdiguba ku koobnaa
In lays weheshado dhammaan
Weliba lays wada jeclaadoo
Waddadii Rabbigana la raaco

Wadaaddo xun baase kacay
Qaar badan waabaayo siiyay
Aada Waaxidow awood lehee
Bal waraabi kaniisaddaada



H



YAY HIIL KA SUGAYAAN?

Amin A. Axmed

Masiixii hir doogliyo
Nolol noo hibeeyay
Annagoo habawsani
Hilinkiisii toosnaa
Nagu hagay allaylehe
Hadalladiisii qummanaa
Haddaynaan addeecayn
Hoogiyo ba' weeyaan

Ruux walbaw heddaada
Bal hagaaji maantoo
Ha raacraacin dunidiyo
Hamigeeda beenta ah


Injiilkaa hanuunkiyo
Laga helo iftiinka
Ruux kastaba harraadkiyo
Ka bi'iya hamuunta
Haddaynaan hirgelinayn
Hagar li'i u fidinayn
Yay hiil ka sugayaan
Hogga kuwa ku sii jira

Qabyo weeye hawshuye
Waa inaan hadiyo jeer
U hurnaa nafteennoo
Heegan aan u noqonnaa

KAALAY GUUSHA HOO

Y.B. Xirsi
Bulsho haybadloo
Hanuunkii Masiix
Inta ay heleen
Ruux hogaamiyaa

Hilinkii wacnaa
Ku hayaamayoo
Guusha hiigsadaan
Maanta kuu hayaa



Hirka doogga liyo
Hoobaan ayaan
Kuu soo helee
Kaalay guusha hoo

Hubka qaata oo
Gaashaan la hubo
Ku hagoonka oo
Sharka haatiyaay

Aynu hadh galloo
Nasashada hellee
Habeen iyo dharaar
Hadalkiisa raac

Hirka doogga liyo
Hoobaan ayaan
Maanta kuu hele
Kaalay guusha hoo

WAXAANSE HUBAA SAMADA

Amin A. Axmed

Anigu hiyigayga maan gelin
Misena laabtayda kuma hayo
Inaan dhulka hoose maaliyo
Hantiba ku urursadoo
Dabeetana isku halleeyo

Waxaanse hubaa samada
Halkay tuuggiyo aboor
Sinnaba ay uga helaynin
Hadday weligoodba doonaan

Haddaba iga hooya waano
Dadyahaw hor ilaahay gaysta
Dhammaan camallada hagaagsan
Berrito idiin hiillin doono

Anoo ballanqaad cad haysta
Marnaba ku hungoobi maayo
Huuhaada iblayska iyo

Wuxuu haatuf soo weriyay
Raadkiisu halaaggu yahay

Waxaase naftayda hagi
Mar kasta i hoggaaminaaya
Injiilkii la iigu habay
Oo aan ka hirqaday anigu

Dadyahaw haddii aad rabtaan
Badbaado inaad heshaan
Haddeerba rabbiga u kaalaya
Idiin haya nolol la hubo

HUNUUHUNUU MA JOOGTEE

Amin A. Axmed

Halgan baa na sugayoo
Tahay himiladiisuna
Saan Aabbaha hortiiisa
Kuwo hufan u noqon lahayn

War hooy yaan lagaa badin
Ayay haatan sheekadu
Hurdaayow maraysaa

Sidee baadse hawlaha
Adna heegan ugu tahay
Si la hubo Injiilkase
Ma u wada hirgelinnaa?

Hadalladii Masixaa
Amar baa ku hoos jiray
Oo ah dunida hoogtay
Ku wacdiya halkeeda

Hunuuhunuu ma joogtee
Waajibkii aad huwatay
Bal maxaad ka haysaa?

Sidee baadse hawlaha
Adna heegan ugu tahay
Si la hubo Injiilkase
Ma u wada hirgelinnaa?

WAXAAN DEGAY HIR DOOG LEH

Amin A. Axmed

Hadduu Erayga Eebbe
Sida hogol da'ayso
Oontiyo harraadkii
Iga haqabtiraayo

Uma qabo hamuun kale
Iblayskii i hodi jiray
Inaan hooy la joogee

Xor baan haatan ahayoo
Rabbigii i helay baa
Xaqa igu hanuunshoo
I hagaaya weligii

Kol haddii heddaydii
Iyadoo hallawsani
Nimco loo hibeeyay
Masixuna hoggaansho

Gole laysku hubo iyo
Waxaan degay hir doog leh
Ka hayaamay beladii

Xor baan haatan ahayoo
Rabbigii i helay baa
Xaqa igu hanuunshoo
I hagaaya weligii

HALKAYSE KA JIRTO MIDNIMO

Amin A. Axmed

Hadday bulsho qaybsantoo
Kooxiba u hayaanto meel
Jab iyo hoog baa ku dhaca
Halkayse midnimo ka jirto
Barakaa ku dul hoorta oo
Haybad baa laga dhaxlaa

Haddaba innagoo hal qura
Hawlaha Boqortooyadii
Habsami ma u sii wadnaa?

Haddaan laysku maan ahayn
Jacayl wax hoggaaminayn
Dadkuba hanan maayo guul
Haddii ayse wadajiraan
Hadafkooduna mid yahay
Iyagu waxba kuma hungoobaan

Haddaba innagoo mid qura
Hawlaha Boqortooyadii
Habsami ma u sii wadnaa?

NIMCADAAN KU HOOS JIRI

Amin A. Axmed

Waddadii halaaggiyo
Anoo hilin xun raacay
Oo aan hubin qiyaamaha
Waxa iga horreeyaba
Halkay noloshu taalse
Adaa igu hanuunshoo
I hoggaansha Eebbow

Adumbaan hadiyo jeer
Isku kaa halleeyaa
Waxaad ii hibaysiyo
Nimcadaan ku hoos jiri

Anigoo hallaysanoo
Hooy madaw dhex jiifoo
Hammi adduunyo mooyee
Hadaf kale lahaynba
Rabbow adaa i helayoo
Halis iga badbaadshoo
Ii huray naftaadii

Adumbaan hadiyo jeer
Isku kaa halleeyaa
Waxaad ii hibaysiyo
Nimcadaan ku hoos jiri



HAKAD YAANU NAGA GELIN

Amin A. Axmed

Sida walaalihii hore
Hirgelinta Injiilka
Ruux hagaag u fuli yiri
Nafta inuu u huro jecel
Ma hungoobo weligii

Heddiisuna qiyaamaha
Soo dhowayn la hubo iyo
Nolol bay ku hanataa

Hawli nimay sugayso
Hurdo uma bannaanee
Hayaankii dhaqaaqyee
Hakad yaanu naga gelin

Haddaad eegto Bawlos
Iyo kuwii la hawl galay
Hammigoodu ma ahayn
Hanti dunida taalliyo
Inay hiigsadaan magac

Hilinkay mareeniyo
Waa inaan habkoodii
Gebigeen ku hirannaa

Hawli nimay sugayso
Hurdo uma bannaanee
Hayaankii dhaqaaqyee
Hakad yaanu naga gelin



Y





SOOMALIDA YAABTAYEE

Aweis A. Ali

Soomaalida yaabtayee
Yabooha ku daashayee
Yablaskoodu yeerayoo
Yacyacood lagu saliday
Dhibaato yaraysi maleh
Carab idin sii yastaa
Yaqyab la hortaagan tihiiin
Yaxyax haddii ad leedihiin
Yaqiin ayaan idiin hayaa
Yabaal lagu gaari karo

Soomaalida yaabaneey
Yoose diin looga dhigay
Yooyootan khayr u qaba
Masiix yaa idiin yimid
Injiil yuu weli sitaa
Yididdiilo aan hubo
Yaa laga helayaa isaga
Ku soo yaaca dhammaan
Qofkii yoolkaan garaa
Nolol yuu helahayaa

Soomaalida yaabku dilay
Yed iyo laba lagu dhuftee
Yoolaalka intaad dhigtaan
Masiix yaa idin jecel
Oo idiin yeerayee
Idiinkoo yoobsana
Tirana aan yarayn
Is yeel yeel aan lahayn
Intaad yeeshaan warkiis
Yac dhaha shaydaan haddeer

GUNAANAD

Waxaa halkan ku soo gabagaboobay taxanaha saddexaad (volume 3) ee *Maansada Masiixa*. Taxana afaraad ayaa soo bixi doona sanadka 2022 haddii Eebbe idmo. Waxaan ku kalsoonahay in aad ku raaxaysateen suugaanta buuggan ku miisan oo aad ku barakowdeen. Fadlan la wadaaga buuggan cid kasta oo xiiso u qabta si ay uga faa'iidaystaan.

Waxaan Eebbe ka baryayaa in uu taxanahan ku barakeeyo Kiniisadda Soomaaliyeed. Jiilasha soo socda ee ah Masiixiyiinta Soomaliyeed waxaan iyagana u hadiyadaynayaa taxanahan. Eebbe haku anfacu hana ku xoojiyo iimaankooda. Waxaa hubaal ah in Masiixiyiinta maanta nool uu Eebbe ku barakeeyo kuna xoojiyo qasiiddooyinkii ay innooga tageen walaalaheen ay ka midka yihiin Aadan Jimaacle Faarax, Cabdulqaadir Mursal, iyo Cali Ibraahim Axmed oo dhammaantood iminka Rabbiga la jira.

Waxaa farxad wayn ii ah in aad iminka gacanta ku hayso taxanahan saddexaad oo laga soo maray hawl aad u badan. Waxaan Eebbe ka baryayaa in uu ku afaco buuggan dhammaan dadka akhrista oo uu qalbigoodana ku negeeyo rumaysadka Sayid Ciise Masiix iyo la socodkiisaba. Eebbe ha u adeegsado buuggan in uu xerta Sayid Ciise Masiix ku soo daro akhriste kasta oo aan iminka rumaysnayn Masiixa. Akhristayaasha rumaysan Masiixa waxaan Eebbe uga baryayaa in Rabbigu iimaankooda marwalbaba xoojiyo.

Waxaan ka codsanayaa dhammaan Masiixiyiinta Soomaliyeed ee Eebbe hibada u siiyay suugaanta in ay iisoo gudbiyaan wixii qasiiddooyin ah oo ay curiyaan si loogu soo saaro taxanayaasha soo socda. Waa lama huraan in Xerta Soomaliyeed ee Sayid Ciise Masiix dhaxal la taaban karo uga tagaan Kiniisadda Soomaliyeed. Sida aan marar badan horay uga shanqariyay, waxaa dhaxal ugu wanaagsan oo la isku hallayn karaa wixii la qoro uun. Dhaqanka Soomaliyeed ee ku salaysan wax afka laga sheego ma ahan dhaxal raaga.

Aweis A. Ali

WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS BOOK 2/2

Poetry speaks to the Somali heart better than dry prose. This collection of spiritual songs is beneficial to both seekers and believers.

Rev. Omar Ali Gaab
Self-employed Evangelist
Midwest, USA

Simply priceless! I wonder why the Somali Church has never done before a series like this. Somali Christians are eternally grateful to the composers and the editor of this series.

Rev. Hirsi Haji Shire
Mission Director
Addis Ababa, Ethiopia

What a joy to see the third volume of the *Maansada Masiixa* series. The poetry in this book is both theologically sound and spiritually profound. I praise God, who has given the Somali Church talented poets and songwriters.





Pastor Ali S. Hussein
Ministry Leader
Eastern Ethiopia



ABOUT THE EDITOR

Aweis A. Ali is a missiologist, and a poet; he has been ministering in the Muslim world since 1993. Aweis has lived and served in world areas that include the Horn of Africa, East Africa, West Africa, and the United States; he earned a B.Th. from the Evangelical Theological College in Addis Ababa, Ethiopia; an M.Div. from Nazarene Theological Seminary in Kansas City, MO. He is currently a Ph.D. candidate at Africa Nazarene University in Nairobi, Kenya. Rev. Aweis can be reached at amazingwisdom@gmail.com.

OTHER BOOKS BY THE AUTHOR



Aweis A. Ali

RAG IYO RABBI
Suugaan Nabadeed Soomaaliyeed



MEN AND GOD
Somali Poetry on Peace

